

# HAILGAN



Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed

• Saansaanka Aragtida  
Imbeerada Itoobiya

• Guudmar Riwaayadeed:  
Taarikh Lama Illaawaan

• Baaqa Isbahaysiga Carbeed  
• Dhaqdhaqaaqa Dhexdhexaad-  
nimada

U Halgan  
Waxbarasho  
Si Waxbarashadu  
Halgankaaga  
U Kordhiso



waxaa soo saara  
**GOLAHA DHEXE EE**  
**XISBIGA H. K. S. BISHIIBA HAL MAR**

### **GUDDIGA QORAALKA**

MAXAMED AADEN SHEEKH /Guddoomiye

ABUUKAR MAXAMED XUSEEN (Ikar)/ Xogaye

### **XUBNAHA GUDDIGA QORAALKA**

Xuseen Maxamed Aadan

Saciid Cabdisalaam

Rashiid Shiikh Cabdulaahi

Yuusuf Suleymaan

### **QIMMAHA**

**Soomaaliya**

Koobigiiba 2/= Shilin

**Sanadkiiba 40=/ shilin oo kharajka Boostada ku jiro**

**Dumida Carbeed iyo Afrikada Bari**

40/= shilin sanadkiib oo kharajka boostadu ku jiro.

**Koonfur, bartamaha iyo Galbeed Afrika**

\$17.00 sanadkiiba Kharajka boostadu ku jiro.

**Aasiya**

\$20.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro

**Yurub**

\$25.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro

**Ameerika (Waqooyi iyo koofur)**

\$30.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro.

# T U S M O

Bogga

**I. DAYMADA:**

— Maalmo xusuus mudan

2

**II. ARRIMAHAD SIYAASADDA, DHAQAALAHAD IYO BULSHADA:**

— UKO: Carruur hanaqaadday iyo kulan tijaabeed  
najaxay (Maxamed Daahir Afrax)

5

**III. NOLOSHA XISBIGA:**

— Wafdi XHKS oo booqasho hawleed ku tegay Shinaha.

7

— Tababar hawl-wadeennada Xisbiga iyo Ururrada Bulshada.

8

— Guddiyada UDHS oo tababar qaatay.

8

— Sannadguuradii 7aad ee Ubaxa Kacaanka.

9

— Kal-fadhigii 3aad ee xiriirka Guud ee U.SH.S.

10

— Hoggaamiyeyaasha Beelaha Miyiga oo hawshooda loo tababaray.

11

**IV. ARRIMAHAD DUNIDA:**

— Lama horaannimada Isbahaysiga Carabta.  
(Cali Maxamed Axmed)

12

— Dhaqdhqaqa dhexdhexaadnimada  
(Xuseen Maxamed Aadan)

13

**V. WAR-BIXINTA BISHA:**

— Jaalle Siyaad oo booqday Yurubta Galbeed iyo Dalalka Carbeed

16

— Shir Jaraa'id

17

— Wafdi Ingiriis ah oo booqday Soomaaliya.

17

— Madaxweynaha JDS oo dhambaal u diray Guddoomiyaha UMA.

18

— Soweeto astaantii diidmada.

19

**VI. HIDDAHA IYO DHAQANKA:**

— Falanqayn Riwaayadeed: Taariikh lama illaawan.  
(Boobe)

20

**VII. ARAGTIDA CILMIGA AH: (Qaybtii Labaad).**

— Siduu Hantiwadaaggu u arko horumarka taariikh kheed.  
(Maxamuud Cabdi Cali «BAYR»).

22

**VIII. BUUGAAGTA IYO QORAALLADA:**

— Saansaanka Aragtida Imbeeriyada Itoobiya.  
(Xuseen Maxamed Aadan)

24

**IX. DHAMBAALKA HALGAN**

S. B. 1204  
Telefoon Lr. 720-51,74  
Qolka Lr. 112


## H A L G A N

oo ku soo baxa afafka Soomaaliga  
Carabiga iyo Ingiriiska.

Guriga Ummadda  
Muqdisho, JDS

CODKA RAMSIGA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.

Bishiiba mar Sannadka 2aad Tirsigii 20aad Juunyo, 1978,  
qiimaha waa 2 Sh.



## Daymada Wargeyska

# Maalmo xusuus mudan

Taariikhda Ummad kasta waxa ku jira maalmo tilmaan gaar ah ku leh halganka adag ee ay ku baadi doonayaan Gobannimo, Qaranimo dhab ah, midnimo iyo in la gaaro himilooyinka qotada dheer ay Ummadda inteeda badani u haqal taagayso. 26ka Juun iyo 1da Luuliyo ee 1960kii, waa maalmo ay xusuusnaan doonaan filalka badan ee Soomaaliyeed ee iska daba dhalanayaa iyagoo si xamaasad leh uga qaybqaadanaya fantasiyaha loo sameynaayo.

26kii Juun 1960kii Gobollada Waqooyiga Soomaalida, oo hor ey Ingiriisku u haystay ayaa noqday kuwii ugu horreeyey Shantii meelood ee Soomaalida loo qaybiyey oo Madaxbannaanaada. 1dii Luuliyo 1960kii waxa ka xoroobay Gumeysigii Gobollada Koonfurreed, oo tan iyo 1950kii Dawladda Talyaanigu u haysay maamul barid noqdayna qaybtii labaad ee tuurtay heeryadii addoonsiga. Isla maa lintaas weyn waxay labada mataanood goosteen inay isugu biiraan Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, sidaas darteed abuuraan Unuggii dhabayntiisa Ummadda Soomaaliyeed muddada dheer u dagaallamaysay.

Labadaas maalmoood waxay tilmaan cad u yihiin halgankii aan loodiska lahayn ee taariikhiga ahaa uu dadkeenu soo galay, iyadoo ay hoggaaminayaan halyeefadii Axmed Gurey, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan iyo Xisbigii SYL. Geedka Gobannimada waxa lagu waraabiyeey Dhiigga Geesiyo badan oo u huray naftooda si dadkooda wanaag ugu noolaado.

Halgankeenna Gobannimadoon ay labadaas tusaale u yihiin wuu heer gaaray 1dii Luuliyo, 1977kii markii la dhisay X. H. K. S. oo ah Xisbiga horseedka ee nooca cusub. Si uu u xoogeeyo isbeddelka dhaqaalaha iyo Ijtimaaqiga ah ee u soeda si Hantiwadaagnimo. X. H. K. S. waa dhaxlahaa iyo sii wadaha halgannadii dheeraa ee dadka Soomaaliyeed u soo galay xornimada, nolol bani-aadannimo oo fiican, midayn iyo halgan aan debec lahayn oo liddi ku ah Imberyaaalidda, Gumeysiga, Sahyuuniyadda iyo Midab takoorka.

Muddo laba sano dhexdooda ah Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu gutay hawlo ballaaran oo ay ka mid yihiin dhis-maha Uururrada Bulshada sida Ururka Xiriirkha Guud ee Shaqaalaha Soomaaliyeed (1dii Maajo 1977kii) Ururka Dimoqraadiga ee Haweenka Soomaaliyeed (8dii Maarsio 1977kii) Ururkii Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, (15kii Maajo 1977kii) Ururkii dhaqdhaqaqa Iskaa-

26ka Juun iyo 1da Luuliyo waa ruuxa dhaqaajinaya ama lulaya halbowlaha dadka Soomaaliyeed meal kasta oo ay joogaan. Dagaalka Geeska Afrika iyo faragelinta Shisheeyaha, kaalmaysanaya Gumeysiga Xabashida waxay duminyaan himilooyinka waaweyn uu dadka Soomaaliyeed muddada dheer u soo halgamayay. Dadka Soomaaliyeed ee ku nool Somaali Galbeed iyo Abbo waxay qaateen qoriga si ay uga taliyaan aayahooda, oo ah xaqa aanu muran ku jirin ee dadyowga la cadaadinayo. Gumeysiga Xabashida ee naf-la-caariga ahi wuxuu isku deyayaa inuu soo riiq ceshado, isagoo ka qaybgelanya shirqoollada lagu meal marinayo danaha Istaraatijiyyadeed ay Ruushka iyo Kuuba ku leeyihii Badda Cas. Shirqoollkaas foosha xun ayaa sabab u ah, dadyowga Soomaali-Abbo iyo Ereteriya loo diido xaqa ay u leeyihii Madaxbannaani.

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya oo ka shiidaal qaadansya Mabaadi'da ku qoran xeerkeeda iyo kuwa Ummadaha Mid-oobay, Ururka Midowga Afrika, iyo Jaamacadda Carabta, Go'aam-mada ku saabsan xaqaa-aaya-ka-taliska waxay taageereysaa dadka Soomaali Galbeed, Abbo iyo Ereteriya oo u halgamaya inay ka taliyaan aayahooda. Dagaalka Geeska Afrika waxa lagaga gaari karaa xal dadyowga ku hoos nool Gumeysiga Xabashida oo loo oggolaado inay aayahooda ka taliyaan.

Haddii aan u soo noqnonno dalkeenna ruuxa 26ka Juun 1da Luuliyo iyo mabaadi'da XHKS ayaa ina hoggaaminaya si aan u kordhino dadaalkeenna, oo u abuurno dadkeena saldhig nolol wanaagsan oo guud.

Inkestoo ay jiraan dhibaatooyin badan oo ay inoo daadinayaan dib-u-socodka gudaha iyo dibedda, inkastoo ay jiraan dhibaatooyin aan laga fakan karayn oo ka dhalanaya nolosha, hase yeeshie, dadka Soomaaliyeed ee geesiyyinta ahi way wadayaan jilibhiggooda, hal-gan adagna way ku qaadayaan dhammaan Cadowgooda, kuwa gab-boobay iyo kuwa cusubba, shakina kuma jiro in ay ugu dambeysta guuleysandoonaan.

Iyadoo aynu halgan ugu jirno mustaqbalkeenna, ayay habboon tahay in aynu dib u jalleecno taariikhdeennii hore ee wacnayd, taasoo la'aanteed aanay jirteen maanta Soomaalida Qaranka ahi.

shatooyinka Soomaaliyeed, 6dii Luuliyo 1978 iyo Ubaxa Kacaanka Oktoobar (18kii Juun 1978) Ururrada Bulshada waxa loo dhisay wax ka qabashada baahida culus ee ku saabsan kicinta iyo Baraaruujinta shaqaalaha iyo Xoogagga Horusocodka ee Mujtamac. Halku-dhegga ah shaqaale urusan ayaa wax qaban kara, shaqaale kala firidhsanji awood ma leh waa in aad loo cuskadaa haddii la doonayo in xukunka gacanta loo geliyo shaqaalaha.


Intaas waxaa dheer inuu Xisbigu furuuc ka sameeyey Gobolla da iyo Degmooyinka, isla markaasna abuuray Unugyada iyo Gucu mada saldhigga u ah. **Hadda Xisiba iyo Ururrada Bulshadu way** ka jiraan dalka oo idil, xilalka culus ee lagu aaminayna way gudanayaan.

Ujeeddada weyn ee Xisbigu waa inuu fuliyo qodobbada muhiim-ka ah ee barnaamijkiisa iyo Xeerkiiisa. Xilka ballaaran ay la gud-boon tahay Xisbiga wax ka qabashadiisa, waa dejin qorsho guud oo lagu hore marinayo dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada mujtamaca ee Soomaaliyeed. Si taas loo xaqiijiyo, aadna looga faa'idaysto khay-raadka dabciiga ah iyo awoodda bani-aadanka, loona awdo fongo-raha ka dhashay qorshooyinkii hore, Xisbiga iyo Maamulka Dowla-ddu waxay dejyeen Qorsho cusub oo muddo gaaban ah oo ku saabsan horumarinta dhaqaalaha ee sannadaha 1979-1981. Qorshahani wuxuu daafac cusub siinayaa Siyaasadii horey u degsanayd ee ahayd in isku fillaansho laga gaaro dhinaca Cuntada Beeraha. Wasaarad-da Beeraha, Wasaaradaha Xiriirku ka dhexeeyo iyo Wakaaladaha lu-gta ku leh arrimaha dhaqaalaha waxa lagu dhiiri geliyay inay tabaa-busheeyaan duruufta lama horaanka u ah dhabaynta barnaamijka is-ku fillaanshaha Cuntada ee 1980ka. Shakina kuma jiro qiimayn qo-dheer oo lagu sameeyo qorshooyinka la dejiyey illaa hadda iyo guu-darrooyinka horyaal oo si run ah wax looga qabtaa, waxay gelinay-saa maamul hufan oo dhaqaale iyo in kor loo qaado awoodeenna wax soo saaridda. Hab maamuleed aan xagga sare ku urursaneyn, oo ah mid dabecsan, ka madax bannaan biirooqaraadiyadda, kuna qotoma himilada Ummadda ee barwaaqo waa jidka asaasiga iyo lamahuraan-ka u ah dhabaynta Istaraatiijiyadeenna fog. Waajibka ugu horeeya ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu yahay inuu abuuro hab qumman oo ku saabsan maamulka iyo Maaraynta, si Go'aannadiisa Siyaasadeed dhaqso loogu fuliyo.

**Arrimaha Siyaasadda, Dhaqaalaha iyo Bulshada**

UKO: Carruur hanaqaaday  
iyo kulan tijaabeed najaxay

— Maxamed Daahir Afrax



Qofkii tagey Xarunta Dhe-xe ee Ubaxa Kacaanka Oktoo-bar, muddadii u dhexaysay 15-17kii Juunyo, shaki kuma jiro in uu kasoo baxay isagoo dhakafaarsan dhaayihii-su-na rumaysan la'. Xaruntaas iyada ah, muddada kor ku xu-san waxaa ka socdey kulan ti-jaabo ah oo ay isugu yimaa-deen qaybaha kala duwan ee Ururka Ubaxa Kacaanka.

Kulan noocaas ah, ee ay carur Soomaaliyed isugu yimaadeen, wuxuu ahaa, kii ugu horreeyey ee soo maray taa-riikhda dalkeenna. Dabeeecaddii shirkaas, dadkii ka qab qaatay iyo jawigii uu ku dhacaa-yey intuba waxay ahaayeen wax la yaab leh oo aan caadi ahayn. Laakiin taas dib baan ka tilmaami doonnaaye, ugu horraynta aan idiinka waranno ujeeddooyinkii shirka, ergooyinkii ka qayb galay iyo arrimihii looga hadlay.

## GOGOLDHIG TAARIKHEED:

18kii Juunyo ee sannadkaan  
ayuu 7 jirsaday Ubaxa Ka-

caanka Oktoobar. Toddoba-daas sannoba 18ka Juun waxay ahayd Maalin la xuso oo loo aqoonsaday maalinta Uba-xa Kacaanka.

“Ubaxa Kacaanka Oktoobar” Abaabulidda iyo barbaarinta ubaxa Kacaanka waxaa xil gaar ahaaneed iska saaray Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta. Waxaa kaloo kaal in libaax ka soo qaatay Xafiiska Siyaasadda MGSK.

Ujeeddooyinka ugu waa-weyn ee loo abuuray UKO, waxaa ka mid ah:-

b) In waqtiga ku habboon ee carruurnimada laga bilaa-bo dhismaha bulshada shakh-siyad caafiaamd qabta leh .

t) In carruurta lagu abaa-biyo jacaylka waddankooda, qaranimadiisa, hiddihiisa iyo horumarksiia.

Madaxweynaha markii uu munaasibaddaas ka hadlayey tilmaamihii uu dhallinta yaryar ugu yeeray ayey ka mid ahayd in ay yihiin «Ubaxa Dal-

ka». Halkaas ayaa laga billaabay in la abaabulo ubadka dalka ee dugsiyada hoose wax ka barta, laguna magacaabo

j. In lagu kobciyo ruux Kacaannimo, laguna abuuro dhaqan iyo shakhsiyad hanti-wadaagnimo.

x) In goor hore la ogaaado mawaahibta soo koraysa «Talents», lana aqoonsado cunug waliba waxa uu ku wanaag-



san yahay, ee u janjeero, si loogu xisaabtamo, looguna dhiirri gelio.

kh) In la baro anshaxa wanaagsan, bulshannimada, isxaqdhwarka iyo tartanka xalaasha ah.

d) In loo carbiyo xilqaadka iyo hoggaaminta bulshada, laguna abuuro isku kalsooni buuxda.

Si looga yoolgaaro ujeeddooyinka kor ku xusan, waxaa la abuuray xarumo kala geddisan oo lagu barbaariyo carruurta ubaxa ah, xarumahaas oo ay ugu weyn tahay xarunta Kamaaluddin ee ay ku taal magaalamadaxda Muqdisho, ahna Xarunta dhexe ee Ubaxa Kacaanka Oktoobar. Xarumahaas waxaa si joogta ah uga socda, ee carruurta lagu baraa, arrimo badan oo u kala duwan sida ay u kala duwan yihiin hiwaayaadka carruurtu, waxaana ka mid ah:

1. Cayaaraaha Isboortiga noocyadooda kala geddisan.

2. Farshaxannimada (Sawirka gacanta iwm)

3. Curinta riwaayadaha iyo jiliddooda.

4. Garaacidda muusikada

5. Barashada ciyaaraha Hiddaha

6. U carbinta aftahannimada iyo fagaaro ka hadalka

7. Qoraalka wargeesyada sheekooyinka iwm

8. Barashada farsamada gacanta.

9. Korinta garaadkooda siyaasiga ah, iyadoo wax lagu dhaciinaayo af ay fahmi karaan.

Xaqijinta ujeeddooyinkii loo abuuray Ubaxa Kacaanka iyo hirgelinta barnaamijkaas loo qorsheeyey, waxaa laga gaaray guulo la taaban karo. kaddib dhalashadii XHKS iyo dhisiddii Ururka dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, UKO wuxuu hore u qaaday tallaaboyin dhaadheer, wuxuuna noqday urur dhisan oo hoos yimaada UDHKS, kaasoo waaxiisa mid ka mid ah loo xilmagacaabay Xoghaye u gaar ah.

Barbaarintii dheerayd iyo abaabuliddii isdaba joogga ahayd ee aan soo sheegnay ka dib UKO wuxuu soo maray marxalad-tayeed cusub oo ay carruurta Soomaaliyeed gaareen heer ay u bisil yihiin hawkiasta oo laga filaayo urur Si-

yaasi ah oo cagiiisa ku taagan. Carruurta UKO, si ay arrintas isaga hubiyaan, dadka kalana ugu muujiyaan waxay qabanaabiyeen nadwad heer sare ah oo ay ku tijaabinayeen sida carruurta UKO ay ugu diyaar yihiin shirar waaweyn oo ay iyagu iskood u abaabushaan.

Nadwaddaas ama shirkaas tijaabada ah oo xarunta dhexe UKO ka soconaayey mud-dadii u dhexeysay 15-17kii bisha Juunyo, waxaa ka soo qayb galay ergooyin ka kala socday ubaxa 14ka degmo ee Gobolka Banaadir, xarunta dhexe UKO, ardayda dugsiyada H/Dhxe, xarumaha dhalinta kacaanka iyo Xarumaha agoonta Ciidammada Qalabka sida; kuwaasoo guud ahaan tiradoodu gaaraysay 347 cu-nug. Waxaa kulanka marti ahaan uga soo qaybgalay, tu-saaloooyin dhaxalgal ahna ka bixiyey Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS Jaalle Siyaad. Waxaa kaloo muddadii uu socday marti sharaf u noqday madax sare oo ka mid yihiin kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweyne Ku Xigeenka JDS. Jaalle S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, Guddoomiyyaasha Ururrada Bulshada iyo Xildhibaanno kale oo ka itsan Golaha Dhexe XHKS.

Kulankaas oo dabadeed «Seminaar» lahaa, arrimihii loogu hadlaayey waxay isugu dhaf-naayeen warbixinno iyo doodo ay isweydaarsanayeen ergooyinkii Carruurta ahay ee ka soo qaybgalay waxayna ku salaysnaayeen saddexdan qodob ee kala ah:

1. Qiimeynta Qarannimada

2. Abaabulka iyo barbaarinta Carruurta


3. Iyo daryeelka da'da soo koraysa.

Run ahaan Shirkaasi martidii ka qayb gashay wuxuu Eeg bogga 21



## NOLOSHA XISBIGA

**Wafdi XHKS oo booqasho hawleed ku tegay shiinaha**



16kii bisha Juunyo waxaa dalka ku soo laabtay Wafdi Xisbiyed ballaaran oo uu hoggaaminaayey Guddoomiyya Hogganka Arrimaha Bulshada ee Golaha Dhexe XHKS Jaalle Axmed Maxamed Faarax. Wafdigasoo dalka Shiinaha ku tagay booqasho saaxiibtinno oo uu ku marti qaaday Xisbiga Shuuciga ah ee Jamhuuriyadda Dadka Shiinaha, muddadii u dhaxaysey 7di Maajo ilaa 12kii Juunyo, 1978ka.

Wafdigu markii ay ka degen gegida dayuuradaha ee magaalada Bekiin, Magaalamaadada Dalka Shiinaha, waxaa halkaas si aad u diiran ugu soo dhoweyey Madax ka tirsan Xisbiga Shuuciga ah ee Shiinaha; ka dibna waxaa u bilaabantay booqasho dheer oo ay ku kala bi xiyeen dadweynaha Shiinaha Gobolladiisa kala duwan 7ba mid ah.

Meelaha Wafdigu booqashooda ahmiyadda gaarka ah siinaayey waxaa ka

taariikhiga ah, sida gidaarka weyn ee Shiina, oo ka mid ah 7da yaab ee duminda, marka laga hadlaayo dunidii hore. Sida la ogyayahay Shiina waxay ka mid tahay meelaha laga helo ilbaxnimooyinka ugu da'da weyn, uguna hodan-san taariikhda bini-aadanka.



Dhammaan meelahaas aan soo sheegnay, wafdigu meeshii ay tagaanba, waxaa ku soo dhoweynaayey madaxda Xisbiga ee halkaas iyo guud ahaan dadweynaha ku nool; waxaana laga siinaayey warbixin ti-faftiran oo ku saabsan halganka Ummadda Shiinuhu ugu jirto horumarinta dalkooda iyo waaya-aragnimadii laga dhaxlay muddadii halgankaas lagu jiray. Wafdigii ka socday XHKS iyo hawladeennada Xisbiga Shuuciga ah ee Shiinuhu, waxay mar kasta isweydaa-

rsanayeen doodo Jaallenimo oo aqoon-isweydaarsi ah, kuwaasoo si weyn loogu kala faa'idaystey, wafdi-xisbiyeedka Soomaaliduna kala soo noqday waayo-aragnimo dhaxalgal ah.

Sida la ogyahay, Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo Xisbiga Shuuciga ee Shiinaha waxaa ka dhaxaysa saaxibtinimo qoto dheer oo ku dhisan iskaashi Jaallenimo, salkana ku haysa xiriir taariikhii ah, oo ilaa muddo kumanaal sannadood gaa-

raysa ka dhaxayn jiray ladaa Ummadood, Shiinaha iyo Soomaalida. Wafdigii ka socdey XHKS, soo dhoweyntii xad-dhaafka ahayd iyo kalgacalkii ay u muujiyeen Xisbiga iyo Ummada Shiinuhu, waxay ka marag furtay saaxibtinimadaas qotoda dheer, oo ilaa iyo taariikhdaas fog ka dhaxaysey labada Ummadood, taasoo dardar cusub la soo baxday markii ay labada dalba hoggaanka u qabteen laba xisbi oo ay midaysey aragtida hantiwaa-dagga Cilmiga ah.

## Tababarka hawladeennada Xisbiga iyo Ururrada Bulshada

Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed, oo hadda laba jirsaday, muddadii labada sano ahayd ee uu dhisnaa, hawilhii uu soo qabtay waxaa laga kororsaday waaya-aragnimo hor leh oo wax-ku-ool u ah socodka guud ee shaqada Xisbiga. Waaya-aragnimadaas waxaa mar walba ka dhalan-aayey dib u habayn iyo isudiyaarin qaab shaqo oo salka ku haya wax qabad-taayeed heer sare ah.

hawladrnneeada Xisbiga iyo Ururrada Bulshada, Had-dana waxaa la gartay in qaar ka mid ah loo tababar xagga hawlaha la xiriira Maamulka Xafiisyada, sida Xisaabaadka iyo garaacidha Makiinadda.

Sidaa awgeed 9kii bisha Juunyo waxaa dugsiga «SIDAM» tababar noocas ah looga furay 60 qof oo ka tirsan hawladeennada Xisbiga iyo Ururrada Bulshada.

da. Tababarkaas oo socondna moouddo 6 bilood ah, waxaa furay Guddoomiyaha hoggaanka Arrimaha Golaha Dhexe Jaalle Ibraahim Maygaag Samatar, oo munaasabaddaas ka jeediyyey hawlihii xisbiga soo qabtay muddada labada sano ahayd ee uu soo jiray, isla markaasna ku qeexaayey xilk aballaaran ee dusha ka saaran hawladeennada Xisbiga iyo Ururrada Bulshada.

## Guddiyada U.D.H.S. ee Gobollada oo tababar qaatay

Xilka socodsinta shaqa xisbiyeedas culayskiisu wuxuu saaranyahay hawladeennada Xisbiga iyo kuwa Ururrada bulshada ee u dhixeeya Xisbiga iyo Dadweynaha, sidaa awgeed; waxaa muuqatay in ay lagama maarmaan tahay in halwadeennada si jgoota ah loogu tababaro hawl kastoo looga baahan karo Xarunta Xisbiga.

Xagga siyaasadda hore ayaa loogu soo tababaray

Bisha Juunyo 5teedii ilaa 19keedii, Xarunta loo yaqaan Hoyga Horumarinta Qoyiska ee ku taal magaaladan Muqdisho, waxaa ka socdey tababar muhiim ah, oo loo furay guddiyada Ururka Dimoqraadiga ah ee Haweenka Soomaaliyeed ee Gobollada iyo Degmooyinka; gaar

ahaan xubnaha mas'uuliyinta uga ah arrimaha Waxbarashada, Xannaanada Carruuta iyo Haweenka, maa-mulka iyo dhqaalaha.

Ujeeddooyinkii tabarakas laga lahaa waxaa ugu weynaa in Haweenkaas loo carbiyo gudashada hawlaha loo xilsaaray iyo in la darso

waaya-aragnimadii laga dhaxlay muddadii sannadka iyo dhownka bilood ahayd ee uu soo dhisnaa Ururka iyadoo xalli loo raadinaayo dhibaatooyinkii ka horyimid socodsinta hawlaha UDHS.

Waxaa kaloo taas barbar socotay casharro guddiyadaas lagula socodiiinaayey xaaladda siyaasadeed ee dalka marxaladdan la marayo. Ururka Dimoqraadiga ah ee haweenka Soomaaliyeed. Casharradaasi Siyaasiga ah kii ugu muhiimsanaa, waxaa haweenka siiyey Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Obokor, kaaliyaha Xoghayha ha Guud ee XHKS ahna Madaxweyne - ku-Xigeenka JDS. Jaalle Ismaaciil oo furiitaankii tababarkaas khubad qaaya leh ka jeediyyey wuxuu Jaallayaashaas xasuusiyey kaalintii weynayd ee haweenka Soomaaliyeed ka soo qaateen halgankii Um maddu u soo gashay Mdaax-bannaanideeda; iyo kaalinta ay maanta ka qaadanayaan hirgelinta himilooyinka kacaanka; taasoo ay ku mutaysteen kacaanku inuu siiyo ahmiyad weyn horumarinta iyo xaqsooridda haweenka. Tusaale cadna waxaa u ah tallaabooyinkii laga qaaday sinnaanta ragga iyo du-marka iyo Xeerka qoyska.

Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed ka sokow, tababarkaas waxaa kaalintooda ka qaataay hay-adaha ka xilsaaran arrimaha bulshada, kuwaasoo ay ka mid yihiin Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbarinta, Wasaaradda Caafimadka iyo Guddiga Xisbiga Gobolka Banaadir. Sida la ogyahay UDHS wuxuu ka mid yahay ha'yada isku ha wla horumarinta bulshada; sidaa awgeed, waa lagama

maarmaan in ay xilkaas weyn iska kaashadaan ururka ha'yadaha dawladdu iyo kuwa Xisbiga ee hawlhoodu isku xiran yihiin.

19kii bisha, waxaa la qabtay xaflad lagu maamuusaa yey xiritaankii tababrkaas. Xafladdaas waxaa ka soo qeyb galay xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS ayna ka mid yihiin guddoomiyaha Ururka dimuqrAADIGA Haweenka Soomaaliyeed, Jaalle Faadumo Cumar Xaashi, Wasiirka Waxbarashada iyo barbaarinta Ja-

lle Aadan Maxamed Cali Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare Jaalle Axmed Ashkir Bootaan, Duqa magaaladda Muqdisho Jaalle Yuusuf Ibraahim Aburaas, Xoghayaha Gobolka Banaadir Jaalle Warsame Cali Faarax iyo Taliyaha Ciidanka guulwadayaasha ummadda Jaalle Cabdiraxman Cabdi Xuseen.

Waxaana halkaas khubbad gebagebayn ah ka jeediyyey Xoghayaha guddiga xisbiga gobolka Banaadir Jaalle Warsame Cali Faarax.

## Sannadguuradii

### 7aad ee U.K.O.



oo ka tirsan Ubaxa kacaanka Oktoobar.

Carruurtaasi waxay u soo bannaanbaxeen Xuska malintaas qimaha gaarka ah ugu fadhiba, 18ka Juunyo, ee ah malintii loo caleema saaray Asaaska Ubaxa kacaanka Oktoobar. 18kii Juunyo, 1971kii ayuu Madaxweynaha JDS, Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Siyad, magaca «UBAXA» ku tilmaamay carruurta Soomaaliyeed, ka dibna waxaa

lagu tallaabsaday in la dhisso Urur ay leeyihii Carruurta loo bixiyey Ubaxa kaacaanka Oktoobar, iyadoo la raacayo tilmaantii Siyaad.

Guutooyinkii ka tirsanaa (UKO), ee 18kii Juunyo isugu soo baxay bartamaha magaalada Muqdisho, waxay socod ku mareen jiddaka ugu waaweyn magaaladaxda; waxayna xirmooyin Ubax ah dhigeen Taalooyinka Sayid Maxamed Cabdille Xasan, Dhadgatuur, Xaawa Taako iyo Daljirka Dahsoon, kuwaasoo mid ah taalooyinka lagu xasuusto halgankii dadweynaha Soomaaliyeed u soo galay madaxbannaanidiisa

iyo geesiyaashii halgankaas u huray naftooda.

Waa arrin qiima weyn oo Waddani ah ku fadhida, markay da'da soo koraysaa booqanayaan, ubaxa dhigaayaan goobihii awooweyaa-shood naftooda ugu hureen difaaca qarannimada, halkaas oo carruurta Soomaaliyeed u ah astaan ay ku faanaan, tilmaan iyo ku dayasho wacanna uga qaataan sidii ay isaga ilaalin lahaa-yeen ilduuuf iyo sinjidhaanimo.

Barnaamijyadii kale ee ay (UKO) ugu talagaleen xuska Sannadguuradoodii 7aad, waxaa ka mid ahaa Xaflad lagu qabtay Golaha

Murtida iyo Madadaalada, isla habeennimadii 18ka Juunyo Xafladdaas oo Ubaxa kacaanku ku marti qaaday Madxda iyo hawladeennada Xisbiga, Ururrada Bulshada iyo dadweyne fara badan oo horusocod ah, waxaa lagu soo bandhigay barnaamij fan ah oo Carruurta Ubaxa muddo dheer ku soo hawlanaayeen diyaarintiisa, si weynna looga heley.

Dadkii Xafladdaas ka qaybagalay waxay aad ugu riyaaseen kartida iyo garaadka sare ee ay muujiyeen carruurtaas yar yar, iyo mustaqbalka ifaaya ee haabanayaan.

## Kalfadhigii 3aad ee Xiriirka Guud ee U SHS



Muddadii u dhaxaysey 10-12kii bisha Juunyo, guriga shaqaalaha ee magaalada Muqdisho ku yaal waxaa ka furmay kal fadhigii 3aad xiriirka guud ee ururada shaqaalaha Soomaaliyeed, oo lixdii bilood mar la qabto.

Ajeendayaashii shirkas looga hadlaayey waxay ah-aayeen kuwa hoos ku qoran: 1) ka warbixin ururka iyo hay'adihiisa kala duwani howlihii ay soo qabteen mu-

ddadii u dhexaysay 2da faxii la qabtay, wixii haka-day iyo wixii hakiyey.

2) Xeernidaamiye loogu tala galay socodiinta howlaha xiriirka guud, kaasoo fadhigu aqbalay.

3. In la kordhiyo tirada urur shaqaaleedyadu laguna baahiyoo dhammaan gobol-lada iyo degmooyinka uu dalka ka kooban yahay, taasoo waayaragnimodu muujiisay baahida loo qabo, waxaa la guddoonsaday in la dhiso urur cusub oo lagu magacaabay «Ururka Dawlahaa hoose iyo hoteellada» kaasoo loogu tala galay in uu noqdo urur daryeela shaqaalaha ka shaqeeya dowl-adaha hoose iyo meelaha gancsiga.

4) Abaabulka iyo aydolojiyada oo loo kala saaro laba waaxood; ka dib markii waaya-aragnimodu muujiisay, hawlaha halkaas looga

baahan yahay in ay ballaran yihiin kuna culus yihiin hal waax. Taasna waa la aqbalay.

Dhammaan Qodobbadaas kal-fadhiga la soo hordhigay waxaa looga dooday hab dimoqraadi ah, oo qof waliba ra'yigisa ka boganayey kuna salayn mabda'a dimoqraadiyadda guddoonka dhexe iyo mabda'a dhaliliika iyo isdhaliilka kuwaasoo ka mid ah mabaadida hantiwadaagga cilmiga ah.

Shirku wuxuu ku socday jawi ay ka muuqto xamaasad kacaanimo iyo ruux hanti wadaagnimo, waxaana dooda iyo hal-ku dhegyo ah oo muujinaayey sida shaqaalaha Soomaaliyeed heegan ugu yihiin xaqijinta himilooyinka Ummadda iyo dhismaha bulsho hantiwadaag ah.

Shirk gabagabadiisii waxaa ka soo baxay go'aanno 2ba qaybood ah:



- 1) Qaybta hore waxay tilmaamaysay marxaladda tariikhiga ah ee maanta Ummadda Soomaaliyeed marayso iyo waajibaadka ay marxaladdaasi dusha ka saarayso xoogsatada Soomaaliyeed
- 2) Qaybta 2aadna waxay ka hadlaysay arrimaha la xiriira daryeelka shaqada iyo shaqaalaha.

Go'aannadaasi iyagoo tif-aftiran waxay akhirstayaa-shu ka helaayaan bogga buugta iyo qoraallada ee wargeyskaan.

Ka dib markii kal-fadhigu xirmay, guddoomiyeyasha ururrada gobollada iyo degmooyinka waxaa u furmay aqoon isweydaarsi soconaaey muddo 4 beri ah.

Aqoon isweydaarsigaas oo laga furay dugsiga tababar-ka shaqaalaha, waxaa lagu falanqaynaayey muddadii sannadka ahayd ee uu soo dhisnaa xiriirka guud, hawlihii la soo qabtay wixii waaya-aragnimo ah ee laga dhalay iyadoo gobol walba markiisa la darsaayey.

## Hoggaamiyayaasha Beelaha Miyiga oo loo tababaray hawshooda

kaaliyaha Xoghayaha Guud ee XHKS, ahna Madaxweyne ku-xigeenka JDS Jaalle S/Guuto Ismaacil Cali Obkor, wuxuu 18di Juunyo Xarunta Ceel Jaalle tababar ugu xiray 447 qof oo ka tirsan hoggaamiyeyayaasha beelaha Miyiga, kana kala yimid Gobollada iyo Degmooyinka uu ka koo-ban yahay dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soommaaliya.

Tbabarkaas oo soconaayey muddo 50 beri ah, waxay dadkaasi ku qaateen casharro la xariira guud ahaan

horumarinta reer Miyiga, kuwaasoo ay ka mid yihiin qaabka hoggaaminta bulshada, daryeelka caafimaadka dadka iyo kan xoolaha iyo horumarinta tacabka beera-ha.

Tababarkaasi intii uu socday madaxdii casharrada ka bixisay waxaa ka mid ahaa Xaghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre oo dadkaas casharro qii-ma leh siiyey 9kii bisha Juunyo 78ka. Jaalle Siyaad ka qaybgalayaashii tababarka-as wuxuu ka dhaadhiciyey

Arrimaha lagu falanqay-naayey aqoon isweydaarsigaas waxay ku qotomeen dhinacyada:-

Abaabulka, aydolojiyada iyo waxbarashada shaqaalaha.

Qodobkaas ugu dambeeyaa waxaa la siinaayey ahmiyad weyn, maxaa yeelay shaqaalaha Soomaaliyeed iyo xiriirkiisa guud, waxay qabaan hantiwadaaggii inuu yahay jidka keli ah ee xogsatadu u mari karto ka yolgaardidda ujeeddooyinka ay u halgamayso.

Isla markaas shaqaalaha hantiwadaag ma noqon ka-raan, haddii aysan baran. Barahada hantiwadaaggana waxaa saldhig u ah qofku iyo waxbrasho caadi ah. in uu leeyahay aqoon guud.

Sidaa awgeed, waxaa lagama maarmaan ah in korloo qaado garaadka shaqaalaha xagga hantiwadaagga iyo xagga aqonta guud.

Aqoon isweydaarsigaasi wuxuu noqday mid laga gaaray guulihii laga filaayey.

qiimaha midnimada iyo si-da ay u tahay furaha horumarinta bulshada wuxuuna ku booriyey in ay ku dadaalaan ilaalinta midnimada Ummadda iyo ka hortagidda wax kastoo dhantaalaya. Wuxuu kaloo Madaxweynu-dadkaas kula dardaarmay casharrada ay halkaas ka qaadanayaan in ay si dhab ah ugu faa'iideeyaa bulshada ay hoggaamiyeyasha u yihiin, si looga yool gaaro himilooyinka Kacaanku Ummadda u horseedaa-yo.

Eeg bogga 21

## ARRIMAHADUNIDA



# Lama Huraanimada Isbahaysiga Carabta

— Cali Maxamed Axmed

Bishi Maarso shir ay isugu yimaaddeen Wasiirrada Arrimaha Dibedda Dawladaha Carabta, waxay go'aan ku gaa-reen in la magacaabo Guddi ka soo shaqaysa, sidii loo soo celin lahaa iskaashigii Carbeed, oo murgay ka dib booqashadii Madaxweyne Saadaat ee Qudus.

Booqashadaas oo ahayd bishii Nofembar 1977kii, waxay ugu muuqatay Madaxweynaha Masar inay u muujinayso ray'ulcaamka dunida dadaalka iyo niyad samida Carabtu ugu jirto nabadraadinta Bariga Dhexe, isla markaasna ay burburinayso shakigii iyo uurxumadii dhextaallay qadiyadda Carbeed iyo dalka Israa'il, taasina ay u adeegayso qadiyadda Carabta guud ahaan.

Xoogaggii ka soo horjeeday tallaabadaas iyada ah waxay ugu muuqatay in aanay waxba ka beddelayn siyaasadda dhul ballaarsiga Israa'il iyo Madax adaya ama macangagnimada ay kula dhaqmayso Ummadda Carabta. Waxa laga yaabaa inay keento isafgaranwaaga dalalka Carbeed, sidaas darteedna ay jid u furto Israa'il ay keli keli ula xaajoo-to Dawladaha Carabta ee ay tooska isaga soo horjeedaan, taasina dhaliso inay noqoto qaddiyadda dadka reer Falastiin oo u ah dhibaatada Bariga Dhexe mid ku lunta meel dhexe.

Abuuridda Israa'il iyo badiitanka joogtada ah ay la barbar taagan tahay Imbiryaladdu ma aha mid iskiis u yimid ama si lama filaan ah u

Run ahaantii taasi waxay

dhacay. Arrintaasi waxay salka ku haysaa qorsho istraati-jiyadeed oo qotodheer oo ay Imbiryaladdu ugu talagashay inay Madaxa kaga garaacdoo kacaanka Carbeed ee horusocodka ah iyo xoogagga Ijtimaaciga ah ee wada. Taas macnaheedu waxa weeye taa-geerada iyo garab qabashada hagar la'aanta ah ay Imbiryaladda iyo Sahyuuniyadda isku-noosha ahi siinayaan Israa'il ma aha mid ka dhalatay samafal ee waxay u adeegaysaa danaha Imbiryaladda ee gobolka, sidaas awgeedna waxay oogaysaa xiisadda ka taagan halkaas.

Israa'ilna mar haddii ay tahay mindi daabkeedii gacan kale ku jiro, ka soo laabmimo-ayo meesha lagu beego, sidaas darteedna, niyad wanaaggaa nabadraadinta Carbeed waxba ku qaadan mayso.

Dhinaca kale dhibaatada Bariga Dhexe ee dami wayday waxa gun iyo sal u ah qadiyadda dadka reer Falastiin, oo har cad dhulkoodii hooyo dibedda looga saaray, iyadoo xumaan banii-aadan lagula dha-qmo aan waxba loola hadhin, sidaas awgeed nabad waarta oo laga gaaro Bariga Dhexe waxay ku xiran tahay xallinta dhabta ah ee qadiyadda dadka reer Falastiin, taasina waxay ku suura geleysaa iyadoo wakiillododa sharciga ahi ay si buuxda uga qaybgalaan fadhiyada iyo goobaha lagu gorfaynayo, lagagana wada xaajoo-nayo nabadda Bariga Dhexe.

Cali Maxamed Axmed  
meel mar ku noqonaysaa iyadoo si wada jira ay meel uga soo wada jeestaan dalalka Carbeed guud ahaan, gaar ahaana kuwa ay tooska isaga horjeedaan Israa'il, shakina kuma jiro in Israa'il iyo Imbiryaladda Caalamiga ah ee ay u adeegaysaba ogsoon yihiin midaas, sidaas darteedna ku daaalyaan sidii loo baajin lahaa, si midba goonideeda loogu keliyastoo.

Waayo-aragnimada Ummadda Carbeed waxay ina tusaysaa in marka iskaashi iyo wadajir ay ku dhaqmaan guuli imaanayso markaase ay kala biiqbiiqaan oo dal kastaaba keligii nin toocsado ay guul-daraysanayaan.

Waxaynu xusuusannahay sidii dadyowga Carbeed ugu og-sadeen garabsiinta walaal-hooda reer Masar markii weerar gardarro ay ku soo qaa-deen 1956kii huwanta: Israa'il, Faransiiska iyo Ingiriiska iyo guushii wadajirkii ku dha-shay.

Shirkii Magaalada Khar-duum ee 1967kii iyo wadjirkii ku dhashay ee lagu dhiciseeyey ujeeddadii gardarrada Imbiryalieed, oo la doonayey in lagu jugeeyo talisyada horusocodka Carbeed, xoogagga kacaanyahaneed oo gobolka iyo wiilqiddii iyo jugtii xoogga lahayd ee lagu gaarsiliyey Israa'il goobihii dagaalka ee 1973kii. Tusaale kalena waxa weeye xorayntii Aljeeriya. Guulahaas oo idili waxay salka ku hayaan iskaashigii iyo wada jirka Ummadda Carbeed.

Iyadoo laga shidaal qaada-nayo waaya aragnimadaa ayey ugu muuqatay dalalka carab-ta lama huraannimada midnimada, ha noqoto xoraynta Falastiin, dalka Carabta ay Israa'il ku qabsatay weerarkii gardarro ee 1967kii ama horumarinta dhaqaalaha iyo no-losha bulshooda, sidaas dar-teedna uu u magacaabay shirkii Qaahira guddi ka shaqaysa-da jirkii dalalka Carabta ay soo celinta iskaashigii iyo wa-murgisay booqashadii Madax-weynaha Suudaan Maxamed Jacfar Numeyri, waxay ka

kooban tahay sagaal dal, wa-xa loo xilsaaray inay cilinbixiyaan is-afgaranwaaga ku dhex jira dalalka Carabta, iyo qabanqaabo Carbeed sidii wada jirka iyo iskaashigii Carabta loogu soo celin lahaa heerkii wacnaa uu garay 1973kii iyo xilliyo kale.

Waxa hubanti ah in himila-da Ummadda Carbeed ee ku saabsan xoreynta Falastiin, dhulka kale ee carabta laga haysto, horumarinta dhaqaaleed iyo kor u qaadidda nolo-sha bulshada lagu xaqijin ka-

ro midnimada iyo iskaashigaa dalalka Carabta. Sidaas aw-geedna ay lama huraan tahay in la qaado tallaabo kasta oo lagu xoojinayo midnimadaas iyada ah, maxaa yeelay dalna keligii uma quturi karo Imbir-yaaliyadda, Sahyuuniyadda

iyo adeegahooda Israa'il, ma-na dhabayn karo dhismo muu-jtamac casri ah, oo ka tarju-maya himilada dadkaasi, si-daas darteedna wuxuu ku sandullaysan yahay isbahaysiga iyo in uu wax la qabsado wa-laalihiisa Carbeed ee kale.



## Dhaqdhaqaqa Dhexdhetaadnimada

— Xuseen Maxamed Aadan —  
yd lagu qabtay waxaa la xee-riyay:

«Inaanu dalku ka mid aha-yin gaashaanbuur millatari oo loo samaystay xiisadda dhextaal xoogagga waaweyn».

Waxa kale oo iyaguna mud-naa labada qodob oo ah:

1) Dalku waa inuu ku dhaqmaa siyaasad madaxban-naan ah oo oggol nabad ku wada noolaanshaha dawlada-ha leh qaabab siyaasadeed iyo bulsho oo kala geddisan, ama waa inuu raacea tub wada noolaanshaha oggol.

2)

Dalku waa inuu si buu-xda u taageeraa dhaqdhaqaqa-yada gobannimadoonka ah.

Dhexdhetaadnimadu waxay dhaqangelinaysaa aragtida la-ga tuujiyay nolol maalmeedka oo ka soo horjeedda dunida oo haamo millatari loo qaybiyo, taasoo inaga fogaynaysa na-bad iyo nabad ku wada noola-anshahaba, isla markaana si-xumeynaysa xidhiidhka caala-miga ah.

Ka sokow ujeeddooyinka si-yaasadeed kooxayntaa milla-

Shirkii Wasiirrada Arrimaha Dibedda ee dalalka dhexdhetaadnimada Carbeed waxay ina tusaysaa in marka iskaashi iyo wadajir ay ku dhaqmaan guuli imaanayso markaase ay kala biiqbiiqaan oo dal kastaaba keligii nin toocsado ay guul-daraysanayaan. 23 Sannadood ka hor ayaa 29 dawladood oo xor ah kana socday Afrika iyo Aasiya Abril 18dii horreysay ku ku kul-meen Baanduung, bishii Abril 18dii 24dii 1975kii. Shirkaa waxa dhaliyay burburkii qaab-kii iyo curashadii qarammo-cusub oo ka hanaqaaday Afrika iyo Aasiya, markaasoo dha-qdhaqaqa gabannimo-doone-ku u baahday laxaad kaal-meeya.

Shirweynihii Baanduug wuu-cuuriyey dhaqdhaqaaqii hanqaaday korontonnadii ee dhexdhetaadnimada. Hadday-nu indha indhayno hawlihi dhaqdhaqaqa 21kii sannado-d oo ugu dambeeyay waxaynu arkaynaa:

b) Baahida daafaca iyo dhidib u aasidda madaxban-naanida siyaasadeed.

t) Taageeridda dhaqdha-qaqyada gobannimadoonka iyo xoreynta dadyowga la gu-meysto.

j) U dagaallanka qaab-dhaqaale oo caalamiya oo isku-dheellitiran si loo xaqijiyo madaxbannaani dhaqaaleed iyo mid siyaasadeedba.

x) U dagaallanka nabad iyo xasillooni adduunku ku waaro, horumar iyo nabad ku wada noolaanshaha dawlada-ha leh qaabab siyaasadeed iyo bulsho oo kala geddisan, ama waa inuu raacea tub wada noolaanshaha oggol.

Dhexdhetaadnimada qaab-siyaasi ah oo caalamiya ahaan ayay u dhalatay waayadii da-gaalladii qaboobaa.

Hoos markaad ugu dhaadhac-do dhexdhetaadnimadu waa baabac dhiig sida ay dalal ba-dani qabaan.

Dhexdhetaadnimada waxa lagaga hortegayaa adduunku oo laba haamood loo qaybiyo iyo adduunka oo kala qaybsa-naantaa dagaal loogu horsee-do.

Si dal uga qaybgalo shirweynihii 1aad ee 1961kii Belgara-

tari waxay adduunka dhaxalsiinaysaa cunaqabataynta, haddii kale tirtiridda qarannimada dadyowga adduunka.

Dabka ka holcaya Geeska Afrika ayaynu tusaale u soo qaadan karnaa, kaasoo inoo xaqijin kara sida tartanka xoogagga waaweyni u sii xumeynayo xiisadaha goboleed, taasoo aan dan u ahayn madaxbannaanida dalalka Afrika.

Maanta xoogagga waaweyn mid ka mid ay oo keliya ayaa qalaanqallo wada.

Mabda'a ah nabad waarta iyo horumar waxa lagu gaadhi karaa iyadoo la tirtiro gaashanbuuraha millatari oo lagu doorsho wax wada qabsi iyo isu soo dhawaynta dadyowga adduunka, sidii lagu guddoon-seday kulanno badan oo dowladaha dhexdhexasadka ahi isugu yimaadeen:

b) Shirweynihii ugu horreeyay ee dalalka dhexdhexasadka ah (Belgarayd, 1961).

t) Shirweynihii 2aad ee lagu qabtay Qaahira, 1964kii.

j) Shirweynihii 3aad ee lagu qabtay Lusaaka, 1970kii.

x) Shirweynihii 4aad ee lagu qabtay Aljeeris 1973.

kh) Shirweynihii 5aad ee lagu qabtay Kolombo 1976kii.

Tirarka waaweyn ee dhexdhexasadnimada waxa ka mid ah sii adkaynta nabadda, wayo dunidan maanta aynu kunoonahay horumarkeeda nabadda ayaa saldhig u ah.

Hase yeeshi arrintaa uma qaadan karno in dhedhexaadnimadu nabadda qiima walba ku qaadan karto.

Mabaadii'da dhexdhexasadnimadu si buuxda ayay uga soo horjeedaa «nabadda» ay Imberiyaaliyaddu rabto inay ku qabsato dadyowga nabadda jecel.

Mabaadii'da dhexdhexasadnimadu waxay hiil iyo hooba sii-naysaa halgan walba oo xaq ah oo hubaysan. Shirweynihii 2aad ee Qaahira ayaa lagaga baaqey: Shirweynaha Qaahira

wuxuu Sheegayaa in weli lagu tumanayo Mabda'a ayaa ka talinta, gobollada dunida qarkoodna laga dafirsan yahay dhaqan galkiisa, taasina dhalisay xiisado abuurma iyo daaalkoo sii fida.

Shirweynihii Qaahira, qaarka horreeyay iyo kuwo ka dambeeyayba, waxay cambaareynayaan mawqifkii xoogagga waaweyn iyo xoogagga lidka ku ah mabda'a aaya ka talinta Ummadaha. Wuxuu qabtay Delhi, 1968kii, UNCTAD III ee lagu qabtay Santiyaagada Jili, 1972kii, UNCTAD IV ee lagu qabtay Nayroobi 1976kii iyo kulammadii VI iyo VII ee garaka ahaa kuna saabsanaa horumarka ee Qarammada Midooobay.

Shirweynihii Aljeeris ee dowladaha dhexdhexasadka ah (1973kii) oo lagu guddoon-seday halkudheggo dhaqaale iyo barnaamij dawleedba dabadii. ayaa waxa bilaabmay dood xidhiidh ah oo dalalka adduunka dhexmartay.

Dowladaha dhexdhexasadka ahi tirtiridda gumeysiga oo keliya uma dagaallamayaan, ee isla markaa waxay u dagaallamayaan horumar. Badiba dowladaha dhexdhexasadka ahi waa dalal dhaqaalahoodu aad u danbeeyo.

Waxa la gudboon inay tallabooyin hore u qaadaan si ay u dhaqan geliyaan xidhiidh dhaqaale oo caalamiya oo isku dheellitiran si ay u dedejiyaan horumarka dhaqaale ee dalalka soo koraya.

Dalalka Afrika, Aasiya iyo Laatiin Ameerikaba waxa isu soo dhaweyay midnimadoodina sii xoojiyay, halgalkooda ka digarogtay madaxbannaanida siyaasadeed ee u baydhay madaxbannaanida dhaqaale.

Wax kale daayoo, dalalkii sababo badan awgeed uga xorobi waayay tabihii cusbaa ee Imberiyaaliyaddu, waxay aqoonsadeen in wadajirka dunida saddexaad lagaga bixi karo gaajada iyo saboolnimada. Sidaa waxaa ka dhashay

kooxda 77ka ah oo lagu abuuray shirkii Qarammada Midobay ee Ganacsiga iyo horumarka (UNCTAD) ee Jineefa lagu gabtay 1964kii.

Kooxda 77ka oo haatan dhan 110 dal, aad ayay ugu firfircoonyad soobandhingga iyo gole keenidda baahida dunida saddexaad oo dhan markaynu eegno shirkii UNCTAD II ee lagu qabtay Delhi, 1968kii, UNCTAD III ee lagu qabtay Santiyaagada Jili, 1972kii, UNCTAD IV ee lagu qabtay Nayroobi 1976kii iyo kulammadii VI iyo VII ee garaka ahaa kuna saabsanaa horumarka ee Qarammada Midooobay.

Shirweynihii Aljeeris ee dowladaha dhexdhexasadka ah (1973kii) oo lagu guddoon-seday halkudheggo dhaqaale iyo barnaamij dawleedba dabadii. ayaa waxa bilaabmay dood xidhiidh ah oo dalalka adduunka dhexmartay.

Waxa intaa raacay iyadoo fadhiyadii gaarka ahaa ee horumarka ee 6aad la qabtay 1975kii, iyo kii 7aad oo la qabtay 1975kii, kulankii guud ee Qarammada midoobay wuxuu soo saaray baaq saameeya xidhiidh dhaqaale oo cusub iyo barnaamij hawleed.

Waxa kale oo kulankaa guud ee Qarammada Midoobay goostay xuquuq dhaqaale oo ay yeeshan dawladuhu.

Wada hadallo kale oo caalamiya ayaa bilaabmay oo shirkarkaa ka dareera, sida wada hadalkii koonfurtiyo waqooyiga ee Baaris lagu qabtay 1975kii, kuna saabsanaa wax wada qabsi dhaqaale oo caalamiya, kaasoo ay ka soo qaybgaleen dalalka warshadaha leh ee galbeedka iyo dalalka soo koraya.

Kulannadii ugu dambeeyay ee dalalka dhexdhexasadka ah waxa ka danbeeyay soo ifbaxa ururro ama hay'ado sida:

b) Saamaynta ururro kulminaya dalalka soo saara alabta caydiin (Sida OPEC) oo

lagaga hortegi karo damaca Imberiyaaliyadda iyo gumeysiga cusub, iyo abuuridda ururro kulmiya dalalka soo kora ya ee badeecaddoda caydiin dhoofiya.

t) Dhidib u aasidda isbahaysi dhaqaale oo lagu daryelo horumarka dalalka dhexdhexasadka.

j) Abuuridda dhaqaale gar ah oo lagu kaaba badeecadda caydiin ee dalalka soo koraya.

x) Xeerar loo dejiyo la dhaqanka maalgelinta gaarka ah, shirkadaha waaweyn iyo isu gudbinta teknoolajiyada.

Tallaabooyin ayaa la qaday si la isugu soo dhaweyyo dalalka hore u marayo iyo kuwa soo koraya.

Dhaqdhaqaqa dawlada dhexdhexasadka ahi wuu sii koraya si uu ula qabsado waayaha geddoomay ee dunida.

Waxa la bilaabay in la sameyo wakaalad wararka ah oo ka dhexaysa dalalka dhexdhexasadka ah, si looga hortago dacaayadaha lidka ku ah himilooyinka dunida saddexaad ee laga soo baahinayo qalabka warfaafinta ee Imberiyaaliyadda.

Dhaqdhaqaqa dhexdhexasadnimadu kama soo dhex bixin dagaalkii qaboobaa ee xoogaga waaweyn oo keliya.

Dhaqdhaqaqa dhexdhexasadnimada waxay himiladiisu

tahay inuu kaalin fiican ka galo ku tallaalidda xidhiidh dimoqraadiya dalalka hantiwadaagga ah. Buurburka qaabkii gumeysiga ayaa hortagan qas iyo qalaanqalna ku ridday koboca Imberiyaaliyadda, isla markaana laxaad taraya xoogagga hantiwadaagga.

Sidaa awgeed, dhaqdhaqaqa dhexdhexasadnimada in dambe laguma tilmaami karo isdiidka hantigoosiga iyo hantiwadaagga.

Dhibaatooyin ayaa durbaba ka soo baxaya horumarka hantiwadaagga oo xarun tilmaaman adduunka lagaga sandulleeyaa, waxay la mid tahay xarakada oo la hakiyo iyo Imberiyaaliyadda oo laxaad la taro iyo xoogagga dibusocodka ah oo dhan.

Xaaladda maanta ka taagan Afrika ayaa arrintaa ka marag kacaysaa xalka sii xumaanaya iyadoo lagu afgobaa-dsanayo faafin iyo fidin nooc gaar ahoo hantiwadaag ah.

Si himilooyinkaa loo xaqiijayo waxa ku habboon dawlada dhexdhexasadka ah inay si saaxiibtinnimo leh u dejiyan xiisadaha ka dhextaagan. Xubnaha dhaqdhaqaqa dhexdhexasadnimadu waa inay geessinnimo u yeeshan inay dhaqdhaqaqa ka saaraan dawladdii ku xadgudubta mabaadiida dhexdhexasadnimada u dejisan.


laha kala sarreyya ee dalalka hantiwadaagga.

Waxay weliba taasi ka muuqataa idiyoolajiyada isdiidyaada, kuwaasoo ka muuqda cabudaadda maarkiisiyada iyo abuuridda monobooliyo arattiyeed oo lagu daneysto, isla markaana lagu gadhqaado xarakada towriga ah ee dunida.

Waxa socda isbeddello soo dedejinaya burburka Imberiyaaliyadda, isla markaana xojojinaaya hantiwadaagga jariska-xornimada, is-biimaynta ama hantiwadaagga oo xarun tilmaaman adduunka lagaga sandulleeyaa, waxay la mid tahay xarakada oo la hakiyo iyo Imberiyaaliyadda oo laxaad la taro iyo xoogagga dibusocodka ah oo dhan.

Xaaladda maanta ka taagan Afrika ayaa arrintaa ka marag kacaysaa xalka sii xumaanaya iyadoo lagu afgobaa-dsanayo faafin iyo fidin nooc gaar ahoo hantiwadaag ah.

Si himilooyinkaa loo xaqiijayo waxa ku habboon dawlada dhexdhexasadka ah inay si saaxiibtinnimo leh u dejiyan xiisadaha ka dhextaagan. Xubnaha dhaqdhaqaqa dhexdhexasadnimadu waa inay geessinnimo u yeeshan inay dhaqdhaqaqa ka saaraan dawladdii ku xadgudubta mabaadiida dhexdhexasadnimada u dejisan.



## WARBIXINTA BISHA

Jaalle Siyaad oo booqday Yurubta  
Galbeed iyo dalal Carbeed

Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo wafdigii uu hoggaaminayey ayaa ku soo noqday dalka 28kii bisha Juun ka dib markii ay u dhammaatey booqasho 11 maalmood ah oo ay ku soo mareen Yurubta galbeed iyo waddammada Carabta. Madaxweynaha iyo wafdigisu waxay kaa ambabaxeen dalka 18kii Juun.

Waddammada ay booqdeen waxaa ka mid ah Cumaan, Qadar, Sacuudi Carabta, Kuwait, Isuttagga imaraadka Carabta, Masar, Ingiriiska iyo Jarmalka.

Jaalle Siyaad, Madaxweynaha JDS oo Xarunta Madaxtooyada ugu warramayey weriyayaal wuxuu sheegay in kulammadii uu la yeeshay madaxda ka tirsan dalalka isaga iyo wafdigisu booqashada ku soo mareen ahaayeen kuwo ku dhammay wanaag iyo is-afgarad.

Madaxweynuhu, wuxuu sheegay in kulammadaa uu la yeeshay Madaxdaasi ay ku soo qaadeen dhibaatooyi-

nka adduunka ka taagan sidii layskaga kaashan lahaa ka hortagga dhibaatooyinka iyo iskaashiga ka dhexeya Soomaaliya iyo dalalkaasi. Waxaa kaloo ay isla soo qaadeen Iskaashiga Waddammada Carbeed iyo Afrika, guud ahaan arrimaha caalamka ka taagan iyo gaar ahaan Geeska Afrika.

Isagoo ka jawaabaya su'aal ku saabsanayd sida ay ugu muuqato Madaxda dalalka uu soo booqday weerarada gardarada iyo daanandaansiga Xabashida ay ku hayso Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ee Soom-



aaliya Jaalle Siyaad wuxuu caddeeyey in madaxdaasi ay u arkaan daandaansigaasi inuusan ahayn mid Xabashidoo quri waddo; hase yeeshee uu yahay mid ay wadaan dawlado waaweyn ujeeddooyin gaar ahna ay ka leeyihiin.

Madaxweynaha Soomaaliya Jaalle Maxamed Siyaad Barre, wuxuu sheegay in Ciidammada Huwanta ah ay weeraradaasi ula jeedaan sidii ay ugu niyad jabin lahaayeen Ummadda Soomaaliyeed hase yeeshee runtu waxay tahay ayuu yiri Madaxweynuhu inaan Ummadda Soomaaliyeed ku niyad jabeynin tallaaboooyinka uu isku dayayo cadowgeedu inuu ku waxyeelleeyo, balse ay ku beereyo geesinnimo iyo midnimo ay ku daafacan qarannimadooda iyo shraftooda.

## SHIR JARAA'ID

Nin ka tirsanaan jiray Urur isku Magacaabay SODAF, ayaa ku qabtay shir jiraa'id bishii Juun 13dii, Magaalada Muqdisho isagoo ku kashifaya dhaqdhaqaqa kooxda yar. Ninkaasi oo magaciisa la yiraahdo Cabdiraxmaan Saalax wuxuu sheegay in kuwa isku magacaabay Ururka SODAF, ay yihiin koox aad u yar, guud ahaanna ka kooban 13 qof, isla markaana aan wax taageero ah haba yaraatee ka haysan Ummadda Soomaaliyeed, sidaas darteedna tiroyaraanta awgeed iyo taageero la'aanta aan kooxdaasi marnaba lagu magacaabi karin urur.

«Dhammaan Xubnaha ku jira kooxdaasi isku magacawday in ay yihiin Urur waxay kala qabaan fikrado gooni ah oo muujinaya inuu nin waliba doonayo dan khaas ah, haba u badnaadeen kuwo qabil u dagaallamaya iyo kuwo in ay hantaan xoolo, waxaana ay xaqiqadu tahay inaysan jirin ujeeddo cad oo la taaban karo oo ay leeyihiin kooxdaas» ayuu caddeeyey Cabdiraxmaan.

Waxaa kaloo uu caddeeyey in, ujeeddada qura ee ay kooxdaasi lahaayeen ay ahayd inay kala qoqobaan Ummadda Soomaaliyeed, wuxuuna intaa raaciye inaysan marnaba kooxdaasi ku fikireyn wax dan u ah Ummadda Soomaaliyeed.

«Kooxdaasi, isku magacawday SODAF, waxay ka soo horjeedaan jiritaanka Ummadda Soomaaliyeed, waxaana ay taageero ka heli jireen Xabashidda, kiiniya, Israa'iil iyo kuwo kale», ayuu yiri ninkas.

Isagoo hadalkisii sii wata waxa kale uu sheegay in Israa'iil oo cadow ku ah dha-

inmaan Ummadaha Muslimka ah ee Carbeed sababa ay kooxdaasi u taageraysey ay ka mid ahaayeen iyadoo aan jecelyn Soomaaliya oo Ummad Carbeed ah, isla markaana ka shaqaynaysa midnimada iyo xoojinta dawladaha Carbeed.

«Waxaanu ogsoonnahay in Xabashida iyo Israa'iil ay ujeeddooyin isku mid ah ka leeyihiin Badda Cas oo ah halbowlaha ay maraan Salidda dawladaha Carbeed ay u dhoofiyaan dalalka Yurub, taasoo ay uga gol leeyihiin in ay ku waxyeelleeyaan dalalka Carbeed, sidaas awgeedna iyagoo ka shidaal qaadanaya aragtidaas ayey taageereen kooxda isku magacawday SODAF» ayuu sheegay Cabdiraxmaan.

Ninkaasi ka tirsanaan jiray kuwa isku magacaabay Sodaf, oo ka hadlaya haddii ay kooxdaasi wax taageero ah ka helaan dalka gudihissa, wuxuu sheegay inaysan jirin qof Soomaali ah oo taageeraya ayna ka soo horjeedaan.

Mar uu ka hadlaayey waxyaabaha ku kallifay, inuu ka mid noqdo kooxdaasi, wuxuu sheegay inuu markaasi ku biiray kooxdaasi isaga oo ku qanci waayey sababihii looga fadhiisiyey shaqada dawladda.

«Si kastaba ha noqotee,

waxaan kaddib ogaaday inaanay shuquu isku tanayn waxyabihii aan miyadda ku hayey iyo ujeeddooyinka kooxdaasi oo an may u snaqeeyan danaha cadowga dadweynaha Soomaaliyeed, sidaas darteeqna waxaan goostay inaan daakeyga in ugu noqdo, kuna usto omadda snarata ten ee soomaaliyeed, anigoo ka taknasusaya wixii aan markaasi gacanayey» ayuu sheegay Cabdiraxmaan.

mar wax iaga weyupusey, naan u xiriid ka amelleyu kooxdu isku daydey amowaan may majaxaariyaan Kacaanka, wuxuu caadeeyey inuusan jirin wax xiriit ah oo ka dhexeeyey labaada kooxood.

Isagoo ka hadlayey bar-naamijkii kooxdaasi, wuxuu sheegay in uu saldhigga bar-naamikaasi ahaa wax al-laale wixii ka soo hor Jeeda danaha Ummadda Soomaaliyeed, wuxuuna intaasi raa ciyey in kulammada kooxdaasi iyo kuwa ay qabbaanka u ahaayeen ka dhici jireen dalalka Kiiniya iyo Itobiya.

Waxaa kale oo uu shaaca ka qaadey inaysan maanta ahayn wakhti uu qof Soomaaliyeed tixgeliyo shucuurt qofrimo, ayna habboon tahay inuu qof walibayesho niyad saafi ah, kuna biiro halganka Ummadda inteeda kale.

Wafdi Ingiriis ah oo SOO  
booqday J D S

Wafdigii Ingiriiska ahaa ee uu hoggaaminayey wasiirkha dawlaha Arrimaha dibadda muddane ted Rowlands waxaa bishan Juun 11dii u dhammaaday booqasho afar maalmood ah oo ay ku joogeen Soomaaliya, waxayna ka ambabaxeen maalintaas

iyagoo ujeedaa dalkoodii sii na maraya dalka suudaan. Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre ayaa ku qaabiley Madaxtooyada wafdigaa Ingiriiska maalintii saddexaad ee ay booqashada ku joogeen dalka.



Madaxweynaha iyo Mr. Rowlands waxay ka hadleen sii xoojinta xidhiidhka labada dal, arrimaha haa tan ka aloosan adduunka guud ahaan iyo Afrika gaar ahaan.

Wasiirka Ingiriisku waxaa uu mahadnaq gaarsiiyey Madaxweynaha ku saabsan sidii diirraneyd ee loo soo dhoweeyey isaga iyo wafdiyiisa.

Ka hor Mr. Ted Rowlands iyo wafdigisu waxay boq-

deen Mashruuca sonkorta Juba ee Jilib iyo magaala madxada Jubbada Hoose, halkaaso ay wafdigu wada hadallo kula yeeshen aqoon yahaannada ka shaqeeyaya mashruuca.

Mr. Rowlands waxaa uu ku adkeeyey in ay dedejyaan dhamaystirka mashruuca, taas oo ku tilmaamey in ay faa'iido ugu jirto dha qalaha Soomaaliya. giisu intii ay joogeen dalka waxay wada hadallo la xi-

dhiidha iskaashiga dhaqaa le ee labada dal la yeeshen Madax Soomaaliyeed oo u ka mid yahay Madaxweyne ku-xigeenka J.D.S, Jaalle Xuseen Kulmiye oo ku qaabilay xafiiskiisa.

Wafdigaa Ingiriiska iyo madax ka tirsan J.D.S. waxay ku kala saxiixdeen xarunta qorshaha qaranka ee muqdisho heshiis ku saabsan iskaashi xagga dhaqala ha ee labada dal.

Heshiiskaas oo qoraya in alaab qiimaheedu dhan yahay 23.433.600 Sh. So. ay dawladaha Ingiriisku ku ka almeysa J.D.S. waxaana ka mid ah doonyaha matoorrada leh ee kalluumeysiga, dhismaha guryaha khubarda ee mashruuca sankorta Jilib iyo shamiinto.

Dhinaca Soomaaliya heshiiska waxaa uu saxeexay Guddoomiyaha Qorshaha qaranka Jaalle Axmed Xabiib Axmed dhinaca dawlada Ingiriiskana waxaa u saxeexay wasiiru dawlah Arrimaha dibadda ee dalkaasi muddane Ted Rowlands.

## Jaalle Siyaad oo dhambaal u diray Guddoomiyaha U M A

Madaxewnaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Bare, wuxuu dhambaal u diray Madaxweynaha Jamhuuriyadda Gaaboon, ahna Guddoomiyaha Ururka Midowga Afrika ee Sannadkan, bishii Juun 28dii, isagoo ku wargelinaya weerarradii gardarrada ahay ee ay dhowaan dayuuradaha dagaalka ee Xabashidu ku so qaa deen degmooyinka iyo Tuulooyin ka mid ah JDS ayna degganaayeen dad rayid ah.

Jaalle Siyaad wuxuu dhambalkiisa ku yiri: Wax-

aan doonayaa inaan Madaxweynow kuu sheego in diyaaradaha Xabashidu weerrak ku so qaadeen, ayna duqeyeen meelo ay deggan yahiin dad rayid ah kuna yaalla JDS, halkaana ay ku laayeen 13 Qof, oo isugu jira haween iyo carruur, konton iyo laba kalena dhaawacyo u geysatay, oo weliba qaarkood halis yihin, isla markaana ay khasare lixaad leh gaarsiiyeyen hantidii iyo xoolihii ay lahaayeen dadkii goobbaahaasi ku noolaa.

«Weerarradaasi waxashi-

nnimada ah ee ay dayuurdaha Xabashidu ku so qaa deen Magaalooyinka Boorama, Gabiley, Qun-u-jeed, Gorayacawl, Kala-Beydh, Balli Caanood iyo Cabduqaadir oo dhammaan ku yaalla Gobolka Waqooyi Galbeed ee JDS, waxa ka soo qaybgalay 11 Dayuurdood kuna soo noq-noqdey saddex jeer intii u dhaxaysay 22kii-25kii bishan Juun» Madaxweynuhu waxa kaloo uu ugu sheegay dhambalkiisaasi, Guddoomiyaha Ururka Midowga Afrika Mundane Cumar Bongo in la

keenay Ciidammo huwan ah isuguna jira Xabashida iyo Kuubaan meelo badan oo ku dhow JDS, taasoo uu sheegay in loola jeedo sidii duullaan loogu soo qaadi lahaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Jaalle Siyaad waxa kaloo uu ku yiri dhambalkiisi: «Xad-gudubkaasi qaawan iyo cadowtinnimadaasi waxa weeye meel ka dhac loo

geysanayo mucaahadooyinka u degsan Ururka Midowga Afrika iyo Ururka Ummadaha Midoobay, mana aha mid khatar gelineysa Soomaaliya oo keli ah, hase yeeshi, waxay khatar gelineysaa nabadda iyo xasilloonida Gobolka Geeska Afrika iyo Guud ahaanba ad duunweynaha».

Madaxweynaha JDS, Jaalle Maxamed Siyaad Barre,

waxa kaloo uu ku caddeeyey dhambalkiisa in Soomaaliya ay marar badan isku dayday inay si nabadgelyo ah uga hortagto gardar rooyinka bareerka ah ee loo geysanayo qarannimadeeda una adkeysatay, wuxuuna sheegay in Soomaaliya ay is daafici doonto haddii ay mar dambe ku soo xadgudubo Xabashidu Soomaaliya khatarna ay geliso nabadgelyadeeda.

## Suweeto Astaantii diidmada

16ka Juun 1976 waxay kalaase lagu sameeyey qal caddaa midabtakoorka iyo jinsi kala sooca, Soweetona waxay noqoteey astaanta niyadda aan liilsanayn ee Afrikaanka ku dhaqan koonfurta Afrika ee ay ku diiddan yihin midabtakoorka.

Sannadguuradan dilkii soweto waxay ku beegantay sannadkaan oo lagu maga caabay in uu yahay sannadka caalamiga ee ladagaa lanka midabtakoorka, oo dadyowga adduunka ku dhaqani ay si laxaad leh ugu diyaar garoobeen shirk Ummadaha midowbay ee ka hortagga midabtakoorka iyo jinsi kala sooca.

Dilkii sharpeville ee 1960 iyo xarakadii dhiiggu ku daatay ee Guguletu iyo kuwo kale weli waa ay xusuus yihin dadka Afrika ah iyo dadyowga adduunka oo dhammi.

Ciidammada booliska ee xukunka madibtakoorka dalkaas ayaa rasaas oodda kaga qaaday arday isugu soo baxday bannaanbax na badeed.

Ka badan 600 oo ka mid ahay dadkaas ayaa ku le'day gacanta ka gardarran ee booliska koonfurta Afrika iyo sida waxshinnimmada ah ee ay u gumaado dadka aan dambiga gelin.

Si ay u xusaan dhaqdha qaaqi Soweto, dadka kala sooca.

sooda qaybaha kala duwan ee bulshada ay ka mid yihiin arday, shaqaale iyo bee raley ayaa isugu soo baxay bannaanbax weyn magaalladda Soweto, isla mar ah aantaa waxa ay ku nuxnux sanayeen dhaqda qaaqa ay ku diiddan yihin nidaamka «Apartheid» iyo jinsi kala sooca.

Mar kale ayaa sannad guuradan labaad ee Soweto boolisku ku qab-qabteen meelaha jid hideenada ah ee transvaal dad ka badan 600, waxaana la mamnuucay kabixid iyo soo gelid magaalada Soweeto.

Ciidammo hubeysan ayaa la dhigay dhammaan irrida ha ku wareegaan degmadaas oo ay dhaqan yihin in ka badan milyan ruux oo Afrikaan ah.

Iyagoo ku andaconaya in ay obole ku qaadayaan ah ka hortaga dhilka.

Xusuusta Soweeto waxay weligeed ku aslanaan doontaa nafaha iyo niyadda dadka diiddan inay qaataan dulliga iyo daandaansiga midabgumeysiga waxaa ayna soo dedejineysa burburka iyo baabi'inta nidaamka midabtokoorta iyo jinsi kala sooca.



## Hiddaha iyo Dhaqanka

# Guudmar Riwaayadeed Taariikh Lama Illaawaan

— BOOBE —

Dib haddaynu taariikhda u raaco waxaynu arkaynaa da' yarida masraxeenna oo ka ka-la tisqaaday Xamar iyo Har-geysa afartanaadkii qarni gan. Inkastoo masraxeennu si-daa u da' yar yahay haddana waxaad mooddaa inaanu dha-lanroggi la rabay masraxeennu ku dhicin. Arrintaana wa-xaynu u magansan karnaa dhowr arrimood oo ta ugu mu-dani tahay dadka masraxeennu ku hawlan oo waxbarasho akaademiya aan lahayn ee wax ku waday dadaal iyo hab-kii ay ka dhaxleen dadkii masraxa uga horreeyey. Haddaad si qoto dheer u deristo masraxeenna waxaad arkaysaa sida aan la isugu dayayn in wax la-ga beddelo qaab masraxeendkii hore u jiray.

Maqaalkan waxaan jecel-hay inaan ku falanqeeyo ri-waayad nooceeda ugu horreysay oo lagu maamusay 1dii Luul-yo 1978ka, maalinta saddexda libinood ku kulmeen ee qaddar-intata iyo qiimeynta ku leh ummadda Soomaaliyeed. Ri-waayaddaa abaabulkeeda wa-xaa isla kaashaday Hoggaan-ka Aydolojiyada iyo Hoobol-lada Waaberi. Sheekada riwaayaddu waxay ku taxnayd halgankii dheeraa ee Ummadda Soomaaliyeed u soo gashay xornimadeeda, maantana ugu jirto xoreynta qaybaha weli la gumeysto iyo hanashada madaxbannaanida qaybaha xornimada gaadhay. Riwaayaddani bilaw ayay u ahayd hab masraxeet cusub. Waxay ahayd Riwaayad aam-musan oo macnaha shee-kadu ku dhammaa dan-

anka ama reenka durbaanka iyo dhaqdhaqaqa Jilayaasha.

Riwaayaddu siday u dhan-tahay waxa jilayay kooxda ci-yaartooyda ee Hobollada Waaber i oo run ahaantii dadaal iyo kartiba muujiyay. Waa marnaba illaawayn sidii dha-khsaha lahayd ee ay sheekadii ugu rogeen durbaan iyo ciyaar iyagoo saldhig ka dhiganaya ciyaarahaa hiddaha iyo dhaq-anka ee Ummadda Soomaaliyeed.

Riwaayaddu waxay u qayb-santay sidan soo socota:

### I. HALGAN

Waa bilowga riwaayadda — waa beelo nabadeed oo xas-loonida iyo nabadda ay ku caa no maaleen ka muuqato ciyaart-a ay u safteen ee sacab iyo durbaan ay isku dareen. Waa qaylo dalluun. Mar Keliya ayaa ciyaartii la hakinayaa, Cabdilqaadir, arbaha riwaayadda ayaa soo gelaya isagoo qalabiisu u dhan yahay oo we-jigiisa dhiillo iyo argagax ka muuqdo. Waa imaatinkii gu-meysiga. Dareen dhalay, nab-addii dib loo celi, degelkii qur-xoonaa, ka hulaaqday digadii, ayaa Cabdilqaadir ku tiraabay goortuu arkay dhulkii oo 5 (shan) loo qaybiyey. Warmoo-ley iyagoo ciyaaraya ayay laba xadhig gooyeen oo Cabdille Raage oo ahaa ninka xidhxi-dhnaa muruq iyo laxaad la sare-joogsaday. Waa 1960kii.

### II. NINBA DANTII.

Waa waayadlii ninba dantii-sa raacay ee la kala dhaqaqaq-ay. Sheekh Abuukar oo ka wa-

laacsan wehel la'aanta calan-ka haysata ayaa hadba qof u tegay. Dheg baan jalaq loo siin oo nin waliba tiisii ayuu ka raacay. Faynuus iyo Cismaan ayaa garowsaday. «Kasay.. kasay». Waa Cismaan Yare, «Waa la kasi oo la kasi». Faynuus ayaa ugu jawaabtay. Guubaabadii Cabdilqaadir iyo Cumar Fakad ayaa lagu kulmay oo Calanka mar keliya lagu kul-may oo kor loo qaaday. Waa curashadii kacaankii Caways-naa ee 21ka Oktoobar.

### III. XILLI KACAAN.

Waa qaybtii saamaynaysay kacaanka oo lagu suntay intii Obole la soo maray iyo siday bulshadu u qaybsanayd. Waa dhix yaacaya intii horumarka bulshada iyo shaqada u heeg-ganayd iyo intii hakinaysay ee mar walba u taagnayd hadim-ad iyo dibindaabyada bulsha-da hayaanka ah. Sheekada oo dhan waxaa lagu muujinayay muuqallo aamusan hase yee-shee si aan mugdi ku jirin dad-ka wax u dhaciinayay. Dadku way shaqaynayaan. Beero, Is-kaa wax-u-qabso, Ololihi far-barashada iyo hawlah kale. Laba nin ayaa dadka dhix yaacaya oo qaylada iyo neef-tuurka aan lagu gaadhin. Waxay dadka dhix yaacaan oo hadba hadimo geys taanba mid ayaa gacanta lala helay oo meel baas lagu tuuray. Dhalashadii Xisbiga H. K. S.

### IV. GOBANNIMO DOON

Waa qaybtii xoreynta gobolla-dii Faransiiska iyo Xabashidu

kala gumeysanayeen. Waxaa u soo horreeyay ciyarta Hay-brraa ee Seyliciga ah, taasoo lagu xoreeyay Jabuuti. Waa xi-gey saddex muuqaal oo gaag-aaban oo si aan mugdi lahayn u muujinaya sidii foosha xumayd ee gumeysiga Xabashidu u jirrabi jiray dadweynaha Soomaaliyeed iyo siday ugu babac dhigi jireen.

### ka yimid Bogga 6aad

ku reebay xusuus dheer iyo ku faanid da'da inoo soo ko-rayya. Wasiirka Waxbarasha-da iyo barbaarinat Jaalle Aa-dan Maxamed Cali oo marti-daas ka mid ahaa, gebageba-dii Shirkaasi hadal gaaban ka jeediyyey, erayadii uu carruur-taas ku bogaadinaayey waxaa ka mid ahaa: «Shirarka aad maqasheen oo ay isugu tagaan Ururrada waaweyn oo caalamiga ah waxba ugama duwa-na shirkiinnaan».

Wasiirku Oraahdaas been kuma sheegin. Qaab-abaabu-leadkii kulankaas hannaankii loo fadhiyey, habkii loo hoggaaminaayey, burutokoolkii hawlihiisa laga kala hagaayey, arrimihii ka soo baxaayey iyo sidii loogu soo beegaayey

### ka yimid Bogga 11aad

Tababarkaas oo noqday mid si weyn looga faa'iiday-stay, gabagabadiisii markii uu ka hadlaayey, kaaliyaha Xoghayaha Guud, XHKS Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Obokar, wuxuu ka war-ramay marxaladda taariikh-iga ah ee maanta dalku maraayo iyo waajibaadka hoggaamiyeeyasha beelaha miyiga ka saaran hawlaho loogu tala galay horumarinta bulshada iyo ka gudbidda marxaladdas adag.

Hoggaamiyeeyashaas tababarku u dhamaaday waxay dib ugu laabteen beeli-

Qaybta ugu weyn ee Riwaayaddu waxay ahayd ta lagu magacaabay «KOLLA IN AAN CABIIDSAMO CAQLIGIINNA YAY GELIN». Ereydaasi waxay ahaayeen kuwo laga soo dheegtay masafu Sayid Maxamed Cabdille Xasan lahaa. Waa dagaalkii gobannimodoo-nka ee Ciidammada huwanta ahi ka qayb qaateen. Waa

muuqaalkaasi ku dhammaa-naya iyadoo Ciidammadii hu-wanta ahaa la hareereeyay.

Waxa intaa weheliya iyadoo Riwaayaddan ay ku jireen 5 (Shan) heesood oo ta riwaaya-ddu ku xidhmaysay ahayd ta Riwaayadda loogu magac daray «Taariikh lama illaawaan».

weyn yahay. Waxaa la yaab leh sida carruurtaas yaryari ugu bislaadeen doodaha iyo fagaara-ka-hadalka, oo aad moodeysid siyaasiyiin waaweyn oo barlamaan fadhiba. Waxaa kaloo la yaab leh, xil-qaadka iyo miisaanka waayeelnimo ee cunug kasta ka muuqatey; laga soo bilaabo 3da Cunug oo kulanka hoggaami-naysey iyo shanta tobant jir ee Xoghaynta ahayd, ilaa ergooyinka hoolka fadhiya, lagu aqoon jiray carruurta da'dooda ah. Sharqanta keli ah ee laga maqlaayey, waxay ahayd hal-ku-dhegyo iyo heeso dhextaal ah, oo ay ku na-sinaayeey, ama ku taageeyay-ey, marba qofka hadlaaya, marka uu xuso munaasabad ku habboon.

naayo ahmyiyadda gaarka looguna tallaabsanaayo ba-rnaamijyada ay ka mid yi-hiin ololihi horumarinta reermiyiga oo hadda la joo-geeeyey iyo fidinta la fidiyey maamulka dowladda.

Hoggaamiyeeyasha beela-ha miyiga iyo tababariddoo du, waa tallaabo loogu gol leeyahay in lagu hawlyar-eeyo xiriirka ka dhxeeyaa hoggaanka kacaanka iyo dadweynaha miyiga, isla markaasna dadweynahaas lagu baro habka ismaamul-ka iyo is-abaabulidda kac-aanimo.



## ARAGTIDA CILMIGA AH

# Siduu Hantiwadaaggu u arko Horumarka Taariikheed

### QAYBTII 2aad

Aragtida Markisimadu inkasta ay dabaqad u hilis ku qoton-to, misna iskama indha tирто in hilinka horumarka taariikh-du raacayso uu yahay mid huflo iyo dabaylo badan. Sidaa awgeed ayey, iska horjeedka iyo is diidka dabeeecadda ka bu-uxda, ee ay la timaaddo bul-shada dabaqiga ahi, soo ban-dhigtaa.

Qodobbadaan soo socda ayaa-na sal u ah:-

a) Horumarka taariikhda ma aha mid si qumaati ah uga gudba heer hoose oo u gudba heer sare. Sidaas dar-teed waxay aragtida Maarkis-mada — Leninismadu qirsan tahay inay horumarka taariikheed xilli xilli ay soo ga-laan qalqaloo iyo leexleexad. Guud ahaanse marka adduunka loo fiiriyo, horumarka taariikheed waa mid kor u socda, taasi ma aha mid inna ka baa-jin karta in waqtio qaar-kood dibudhac iyo hakadyo soo gaaraan. Arrintan iyada ah waxa laga arki karaa sidii ay faashisimadu sannadihii 1920kii iyo 1930kii Qaaradda Yurub siyalo uga guulaysatay. Maantana waxaynu oran karnaa waxyaalaha ka socda dalka Jili waxay la xiriiraan arrintan aan soo xusnay. Waxay arrintani u dhigantaa, si-da marmarka qaarkood ay jir-radu u kala dhantaasho kor-riinka jira. Si kastaba ha aha-atee, dibu-dhaca iyo hakadka iyo dhaawaca mar mar soo ga-raa diciicadda iyo bulshadu ma aha mid baajin kara ama beenay kara runnimada qaa-nuun guud ahaaneed ee xuk-kuu-ma horumarka taariikheed, kaasoo ay dhammaan ku hir-

Maxamuud Cabdi Cali (Bayr)

taan ururrada siyaasiga ah ee hoggaamiya dadyowga iyo dabaqadaha kadeedan, una horseeda nolol aadaminnimo iyo sareedo leh.

b) Qaska iyo iska hor im-adka ka buuxa horumarka taariikheed wuxuu ku cad ya-hay si ay heer sare u gaaraan cilmiga iyo Teknooloojiyadu; maadaama ay arrintaasi kee-nayso baahida baani'aadamigu u qabo inuu baahi bax had-walba gaaro. Bulshada ku dhi-san iskadeedka iyo isku kor-noolaadka dabaqadeed waxa astaan u ah in koriinkeedu yahay mid aan isu dheeli tir-nayn (isu miisaanayn), horumarka bulshaduna marna si siman uma wada socdo. Bul-shada noocas ah waxa laga arki karaa in aanay marna is lahayn heerka sare ee laga gaaray cilmiga iyo teknikadu marka la bar bar dhigo arad-naanta iyo cayrimada bulshada ka haysta dhinaca ruuxa (nafta) iyo akhlaaqda. Horumarka kasta oo dhaqaaleed oo ay gaarto bulshada ku dhisan dabaqinnimadu, waxa ka cadaan karta mashaqada iyo mashaakilka ka haysta dhinacyo badan oo ay ka mid yi-hiin faqriga, baahida, darxu-mada, hooy-xumada kala fa-quuqda nolosha magaalada iyo tan Miyiga. Halkaas ayey ku jirtaa ciladda iyo cudur-ka ka iman kara iska horjeed-ka dhix yaal raasmaalka (la-cagta) iyo shaqada, hawlmas-kaxeedka iyo muruqmaalka. Wadcigaas oo kale waxa hu-baal ah inay bulshadu u kala baxsanaato koox sarreysa oo sareedo ku nool iyo in ba-dan oo baahi iyo kadeed sed-kood yahay.

### HILINKA TOOSAN EE HORUMARKA BANI-AADMIGA.

Sidaan hore u soo sheegnay horumarka taariikheed waa inuu tixgeliyaa adduunka ay-nu ku nool nahay iyadoo lays-ku wada qaadayo ifafaalaha diciiciga, kan bulshada iyo maskaxda bani'aadmiga oo idil

Waa in isha lagu hayaa dham-maan dhinacyada kala duwan ee la xiriira nolosha bulshada.

Intaas ka sokow, waa in la waafajiyo Idoloojiyada ka-faala qaaday baahitirka himi-lada dadweynaha xoogsatada ah ee bulsho kasta ku kooban. Sababtaas awgeed ayaa arag-tida Hantiwadaagga oo ah tan ugu dambeysa ay hubay-saa dabaqadaha kadeedka iyo dhiigmiiradka ku hoos nool sidii ay isaga ridi lahaayeen taliska hantigoosadka iyo hab-kiisa, xabaalma ugu hubsan lahaayeen maadaama uu dhammaystay da'disii.

Muddo qarni ka yar habka hantiwadaaggu ka dhaqan galay dunida, waxa uu xaqqi-jey awooddiiisa iyo mudnaantiisa uu u leeyahay horumarinta Bulshada iyo kor u dhi-gidda nolosha bani-aadamiga.

Qodobbadaan soo socdaa waxay inna tusayaan sida habka han-tiwadaaggu uga door roon ya-hay, uga mudan yahay, uga-na sarreeyo habka hantigoosadka.

1. Quwadda baaxadda weyn leh ee hantiwadaaggu ku ururin karo, kuna nidaamin karo dadweynaha xoogsatada ah waa mid waxtar weyn u leh kordhinta teknikada iyo dhaqaalaha, waana mid keenay in si joogta ah wax soo saarku kor ugu aado iyada oo dadkoo idil ku manafaacsana-yaan.

2. Waxa korriinkaas iyo ho-

rumarkaas qumaatiga ah kee-naya, qorshaha cilmiga ah ee habka hantiwadaaggu caanka ku yahay kagana duwan yahay habka hantigoosadka astaantiisu tahay qaska iyo danaysiga gaar ahaaneed ee aan marna u aabba yeelin no-losha Bulshada.

Qorshaha hantiwadaagga oo haatan xataa culimada bur-juwaasiga qirto wanaaggiisa iyo sarreynta wuxuu liddi ku yahay oo mar walba tirtiraa biiruqraadiyadda iyo keli maa-mulka horukaca ka soo hor-jeeda.


3. Hab walba waxa laga dhix heli karaa iska horimaad iyo is-diid; hase yeeshee, habka Hantiwadaaggu wuxuu mid kasta bara dheer yahay tixge-linta uu tixgeliyo qawaaniinta dabiiciga ah iyo qawaaniinta xukuma horumarka Bul-sheed, markaasna u dejiyaa majaraha ugu xaqqiin weyn danaha Bulshada.

4. Horumarka Bulshada habka hantiwadaagga, ma aha mid qayb gooni ah oo nolosha Bulshada saamaynaya mana aha mid inna xuquuqda qofka keliya dhaawacaya sida y ku andacoodaan dadka qaar-kood. Habka hantiwadaaggu waa kan keenay in markii ugu horreysay taaiirkhda dunida awooddha iyo aqonta bani'aadmiga sida ugu waxtar roon, soo ifbixiyey meelna mariyey. Wuxuu habkaasi is-waafajiye midaynta danta gaar ahaaneed ee qofka iyo tan guud ahaaneed ee Bul-

shada; ammuuraha khaaska ah iyo kuwa caalamiga ah isago u dejiyey falsafad si cil-mi ah u kala dhigdhigaysa. Fulinta habkaasi wuxuu kee-nay in qofku gaaray inuu han-tiyo waxyaalihii daruuriga ahaa oo idil, fursadna u helo inuu u gudbo dhammaystirka xornimadiisa taamka ah (bu-uxda).

Gabagabadii, waxa marag ma weydo ah in qofka bani-aadmigu yahay ka adduunka ugu sita, ugu awood weyn marka uu helo duruufa ku habboon iyo habka ugu fiican, kaasoo ah kan hantiwadaagga. Intaasi marka ay isugu du-bbadhacaan ayaa awooddha xad dhaafka ah, bani'aadmigu ka dhaansan yahay soo ifbaxayaa si uu horumar taariikheed oo lama maqal ah u gaaro. Iyadoo uu aragtidaas ku hiranaayo ayaa qofku ku biiri karaa, waxqabadkiisana ku biirin karaa malaayiinta la maan ujeeddo ah oo ku hawlan sidii ay uga xaaqi lahaayeen ad-duunka dhammaan kurtimma-da hortaagan nolosha, una dabargoyn lahaayeen falka caadooyinka, iyo hababka ga-boobay ee ku dhisan maanga-abnimada, danaysiga, kadeed-ka, burcadnimada, iyo car-banaanta; halkoodna ay u gelin lahaayeen bulsha siman oo ka xorowday dhib iyo baahi, iyo isku kor noolaad.

Markaas kaddib ayaa qofka isku taagi karaa lugahiisa, garan karaana qiimaha iyo qaayaha xad-dhaafka ah ee uu istaahilo.



## BUUGAAGTA IYO QORAALLADA

### Saansaanka Aragtida Imbeeriyada Itoobiya

— Xuseen Maxamed Aadan —

Mesfin Wolde Mariyam, Madaха Qaybta Juqraafiga ee Jamicadda Xayle Selasse I, Adis Ababa, ayaa 1964kii daabacay, buuggiisi ugu horreeyay ee uu ku daafacayay gumeysiga Xabashida — xiisadda sohdimed ee Itoobiya iyo Soomaaliya dhextaal. Isla qoraalkaa (Buugaa) ayaa ku soo baxay «The Journal of Modern African Studies», 2-2 (1964) bogagga 189-219. Mesfin 1971kii wuxuu qoray buug uu ku daboolayo gumeysiga Xabashida oo lagu suntay: Soomaaliya Ilmaha Qalaanqalka Afrika (Adis-Ababa, 1977kii). Buuggani wuxuu la xidhiidhaa kii hore, bal se intaanan isaga wax ka sheegin, ka hore aan erey ka idhaahdo.

**MESFIN WOLDE MARIAMKII  
1964kii MASKAX GUMEYSI  
OO NUGUL**

Qoraalkiisii 1964kii, Mesfin Wolde Mariyam wuxuu isku dayay inuu u duurxulo oo derso heshiisyo sharchiya oo caalamiya si uu u «Xalaaleeyo Xaqahaanshaha» gumeysiga Xabashiyed ee Soomaalida Galbeed.

1964kii Imbeerada Itoobiya, oo uu u madax yahay Xayle Selaase, libaax ku-sheeggii Judda iyo Boqorkii Boqorrada waxay u ekayd wax waaraya, Mesfin Wolde Mariyamna mustaqbal fiican ayaa u soo ifay. Indheergaraadkii gumes-taha ahaa si debecsan ayuu u

noolaan karayay. Waxay la noqotay in Soomaalidu ku ni-yadsantahay abaalna ugu hayso isaga hadduu ka fududeeyo mahadhada ku soo fool leh. Isagoo ku kalsoon nin gumeed-nimadiisa, Wolde Mariyam, 1964kii wuxuu ku baaqay in Xabashidu sii gumeysato Soomaalida Galbeed sababo «Dhaqaale ama Istaratejiladeed awgood». Saadaasha ah in dalkaa badrool laga helo ayaa weyneyd». (1). Isagoo arrintaa cuskanaya, Wolde Mariyam wuxuu qoray:

«Waxaan isku dayay inaan muujiyo in Itoobiya iyo Soomaaliya aanay derisnimo keliya wadaagin, aad ayay isugu baahan yihiin, isuna dheellitiraan, waxan u soo jeedin karaa labada dawladood inay wada dheefsadaan badroolka». (2)

Waxaynu halkaa ka dareemaynaa dabciga qab weynaanta oo qoraaladda Wolde Mariyam ee 1964kii ku astaamaysan; qab weynaanta waxaan ula jeednaa fikradda daafacadda gumeysiga iyo sinnaan la'aanta. Caqliyadaa isticmaariga ah waa mid khatarnimadeeda iyo xirfadnimadeeda muuqata leh. Qab weynaantu sideedaba waxay dhab ahaanteeda muujisaa marka dadka la gumeysto xaqooda aaya ka talinta cadsadaan. Gumeystuhu isagoo askumay nidaam akhlaaqiyad oo dhan ka arradan, gumeystuhuna yahay caga joogaye aan denbi lahayn ayaa qoraalada 1964kii ee indeergaradka gumeyste u hiliyaha Wolde Mariyam saama-xaad ku weydiistaa. Caqliyad-

daa iyada ah waxaa loogu bahan yahay si aan dadka la gumeysanayo gumeysiga u dhaleecayn.

Dhacdooyinkii waayadan danbe waxay inoo muujiyeen hoobashadii Imbeeradii Xabashiyed, taasoo ay la ilgaleen qabkii dadnimada ka arradnaa ee u oggolaanayay indheergaradka gumeystaha inuu isu arko daacad. Si ka geddisan lixdannadii, 1977kii wuxuu u muujiyay inaanu ladnaantii ku waaran. Intuu shukadii isla weynaanta iska rogay ayaa la waayay qosolkii munaafaqni-daa ahaa ee maskaxda gumeystuhu ku ladhayn.

Mesfin Wolde Mariyanka 1977ku intuu taahay ayuu la soo baxay ciddiyo weer neef bakhtiistay. Hase yeeshay, taha ka sokow, weerka 1977ku waa mid dhaawacan, waa mid jirran. Wolde Mariyam buuggiisa 1977ku waa mid aflag-addo aad u rakhiisi ka buuxdo Waxba cay u lama hadhin dadka Soomaaliyeed iyo Soomaaliyaba. Codkiisu deggaanaan-sho iyo kalsoonida wuu ka madhanyahay. Waa cod qof xanaaqsan oo cataabaya. Malaha, inaan sidaa ugu taagsado looma baahna. Waayo, waxa inagu habboon inaynu garowsanno in gumeysiga Xabashiyed maalinba maalinta ka danbeysa sii foolxumaanayo, xishoodka ka sii tegayo, waxshinimadiisuna sii badanayso. Waxa la isku raacsanyahay in koox kastoo wax gumeysataa marka hore goob walba ku ceebwdo.

#### ARAGTIDA EEDAYNTA XAQLAHA

Mesfin Wolde Mariyam buuggiisa, Soomaaliya Ilmaha qalanqalka Afrika, wuxuu tusale cad u yahay aragtida Imbeerada Xabashiyed, aragtida eedaynta Xaqlaha (3) si ay u jideyo una sii waddo cadaadiska. Qoraallada marki-siga ah, aragt (Idiyoolajiyad) waxa looga jedaa:

1. Fikrado la wadaago oo dabaqad ama kooxi ka simantahay.

2. Fikrado dhalanteed ah oo lagala hortegi karo qaar cilmiya ama run ku aroora.

3. Marxaladda guud ee lagu curiyo fikrado.

Qoraalkaygan, ereyga «Aragti» waxaan ku kulminayaa (1) iyo (2). Isagoo muujinaya siduu adduunka u arkayo iyo kooxda cadaadisa dabaqadaha Xabashiyed, Wolde Mariyam wuxuu aad u ifinayaa dhinaca Eidaynta Xaqlaha ee aragtidaa. Sidaa awgeed, taariikhahaan xaaladihii murugsanaa ee qowmiyad iyo bushaba la-haa ee Geeska Afrika waxa loo sawiray qaar la xidhiidha korriin-xumadii dadyowgii la gumeystay — halkan «Soomaalida iyo Soomaaliya». Soomaaliya waxa lagu eedaynayaa dhibaatooyinkii isku biirsaday Itoobiya, haatanna ka dhex qarxaya Imbeeradii horee Xabashiyed. Mesfin Wolde Mariyam tab aad u fudud oo arrintaa lagu maareeyo ayuu keenay: dadka la gumeysto ha la doorsho, ama Soomaalidu ha beddesho «Saykolojyadeeda gurracan». Soomaalida waxa

Dadkaas iyaga ah waa inay fikradahaas Afrikaanku diido si xalal Afrikaan ah loogu he-lo dhibaatooyinka Afrikaanka.

#### FURFURID CILMI NAF- SEED EE DADKA DULMAN.

Mesfin Wolde Mariyam wuxuu takhasus ku leeyahay juqraafiga. Hase yeeshay xeeldheernimo cilmi nafseed iyo daaweyn cudurrada maskaxda innaba cilmi uma laha. Laakiinse si uu ceeb Soomaalida uga helo wuxuu tuurtuu-

loo sawirayaa «Ubad aan dhammays ahayn» oo aanay u suurto gelin inay si habboon u koraan. Wolde Mariyam, dadka la gumeysanayo iyo inta halgankooda ku taageertada wuxuu u sawirayaa wax aan dhammays, gurracan, waxshi-ya oo aad u dan beeyaa.

Quudhsi dahsoon ayuu ku daboolayaa tirakoobyo, tixraac yo dhadhan la' iyo erayo uu ka soo xaday ereybixinta Hanti-wadaagga Cilmiga ah.

Mesfin Wolde Mariyam dha-waaqiisu waa mid ra'yal caamka adduunka ugu baaqaya sidii wax looga qaban lahaa dadka xaqooda la tiray, hase yeeshay taasi isaga lama aha in imbeerada Itoobiya midabkeeda gumeysigu dhalan rogo-mo, si dadka walaalaha ah ee Geeska Afrika heshiis qowmiyadeed iyo nabad waarta u gaaraan. Hase yeeshay qoraalka Mefsin Wolde Mariam waa dhinaca dagaallada gumeystayaasha ee aydiyoolojiga ah, nasiib xumaduna waxay tahay in taasi maskaxo badan oo wanaagsan ee Itoobiya iyo Afrikada kaleba sumeysey.

Hadalkaa horraantiis wuxuu ku andacooday in Soomaalidu «Cudur cilmi nafsi denbiilayaasha waaweyn qabto». Oraahdaasi waxay inna soo xusuusinaysaa fiirsasho, qiime leh ee Franz Fanon taasoo ku leeyahay gumeysigu wuxuu isu haystaa «hooyo carruurteeda fidmo walayaasha ah xarigga ku haysa, oo ka ilaalinasu inay dhiillo naftooda gumeysi ku dheehan tahay waa mid dhinac walba il-meheeda iska celinaysa».

Wolde Mariam Buuggiisu waa mid fekerkiisa ka soo am-

aahanaya buuggii M. Mannoni ee «Prospero iyo Caliban»: Cilmi nafseedka gumeysiga oo Aime Cesaire mar faallada soo socotaa ka bixiyey, «M. Mannoni tallaabo, tallaabo ula sooco khayaanooyinka sixirlaha ah oo uu inagu qancinayo gumeysigu inuu gebi ahaan cilmi nafsi jirridii tahay. Taa waxaa daliil u ah in koox da **■ Info** **Info** **Endar ah** ku tiir sanaan dad kale, in dadka la gumeystana geddigood caqliyadaa ku tiirsanaan dadyow kale qabaan. Sababtaa ayaa ugu wacan in dadyow badan la gumeysto».

Haddaba Mudana Mannoni  
ma jecla midabtakoorka iyo  
gumeysi qayaxan kuwaas oo  
waxshi ah ee wuxuu doona-  
yaa arrinta oo dhan inuu ku  
dhalan rogo cilmi nafsi furfu-  
rid kolkaasoo wax alloo xun-  
la hagaajinayo, xumaato kas-  
tana cudurdaar fiican loo he-  
layo».

Mesfin Wolde Mariam dhab-tii waa arday M. Mannoni laakiinse aan weli heer fiican gaa-rin, sidaas darteed bal aynnu-sii wadno hadalladii murtida-lahaa ee A. Cesaire, «Kelme-daha cusubi yeeyan ku khal-din, ha illaawin hadalladii hore madowgu waa carruur wey-

Dhinac kasta hadalkaas ayey u dhigdhigaan natiijaduna waa Mannoni-Madowgu xornimada ma yaqaaniin, ma doonayaan, waxay ku sameeyaan ma garanayaan». Cesaire oo hadalkiisii sii wata baa odhanaya, «Haddaad Mannoni u sheegtid dagaallada reer Madagaskar kicisay, kii ugu dambayneyna ahaa 1947, wuxuu kuugu jawaabaya waxaasoo idili waa dabci waalli oo loo dhanyahay, dadkuna dagaalkooda ulajeeddooyin qeexan

kuwa doonayaan ee nabadgelyo khiyaali ah bay raadinayaan.

Sidaasoo kale baa Mesfin Wolde Mariam, u dirirka aaya ka talinta iyo midnimada dadka Soomaaliyeed ugu sheegaa waalli maryo xoor ah. Isagoo isticmaalaya kelmedihii furfurid cilmi nafseedka buu leeyahay caqliyada Soomaaliyeed waa mid siloon oo cadowgeeda iyo saaxiibkeedaba waxyeello u soo jiidaysa». Wolde Mariam isagoo hadalkiisii sii wata buu fekerkii Mannoni oo idil dadka Soomaaliyeed ku dabbaqaan. Wuuuu diidayso oo kale

III daaka Soomaaliyeed gameysigu hoog iyo rafaad soo mar-shey. Wuxuu oranayaa, Soomaalidu waqtii walba diyaar waxay u ahaayeen inay gumeysi-ga gacmo furan ku soo dhow-eeyaan, halkii ay ka halgami lahaayeen». Wolde wuxuu kalooyahay ku andacoonaayaa «in koon-furta Soomaaliyeed farxad u ahayd in Talyaanigii toban sa-

Fikradaha kor ku cabbiran qofkii qaataa hubaal waxay la noqonaysaa Soomaalidu xorniyeed, inay lamiga ahba taliye ka yahay ay Soomaaliya ku khasbayso inay xasiloni la'aan ka aloosto gobolkan Geeska».

ayd gumeysitihi Ingiriiska kii  
inna ku beeray xornimo u dir-  
irka iyo raadinta Soomaali  
weyn. Xisbiga dhallinyarada  
Soomaaliyeed waxaa Ingiriis-  
ku u abaabuley, madaxdiisana  
u tababaray si ay umuliyaal  
himilooyinkii kor ku xusan u  
noqdaan.

Wolde Mariam isagoo sii wata dacwadihii cadowtinimo ee Soomaalidu uu u qabey ayuu wuxuu ku nuuxnuuxsaday in fikradda aayo ka talinta uu inna baray xeeldheeraaha caanka ku ah daraasadda dadyowga **Bariga Afrika** mudane dane I.M.Lewis» 14 Wolde Mariam wuxuu la kaashadaa khu dbad aaya ka talinta dhabta ah la xiriirta ee I.M.Lewis Jamicadda Glasgow sannadku 1964 ka bixiyey. Maxay ahaayeen duruufta khudbadaas sabab u ahayd? yeey ahaayeen dadkii ka qaybgalay? Wolde Mariam arrimahaas oo idil shi btuu ka galay, isagoo qiiq isku qaris ka dhiganaya go'aanka maangaabnimo ee uu gaaray oo khaldaysa akhristaha aan arrinta la socon oo ah, «runta sida dharaarta u muuqata waxaa weeye in meel uu I.M. Lewis oo aqoon gaaban u leh Qaramada Midobey iyo kan Caalaliga ahba taliye ka yahay Soomaaliya ku khasbayso inay xasiloni la'aan ka aloosto

Go'aanka waxaa lagu gaaray si khayaano ah, oo beenaad ah lagu magacaabo qof aan lahayn Qodobbada buugga ku qoran sidey u badanyihiin wax dhab ah kuma jiraan, go'aan-nadana si aan daacad ahayn buu minguurin aan sideedii ahayn kala soo baxayaa.

Qaybta 2aad ee Kiriitikan  
wuxuu ku soo bixidoonaa  
cadadka soo socda ee HA-  
LGAN

# Dhambaalka Halgan



Jaallayaal iga guddooma salaan kasha iyo laabta ka soogiday, salaan ka dib waxa nasiib wanaag ii ah in aan idiin soodiro warqadaydii ugu horraysey.

Anigoo ah akhristayaasha Wargeyska Halgan waxaan id inku hambalyeynayaa sida wanaagsan ee aad u hirgeliseen socibixitaanka Wargeyska.

Wargeyskan Halgan oo qayb libaax ka qaata kicinta iy  
baraarujinta ummadda isagoo leh duruus gaar ah oo laga bar-  
to, taas oo ah aragtida cilmiga, oo faa'iido weyn u leh qof kas-  
ta oo waddani ah ama garanaaya ujeeddada laga leeyahay iy  
waxa ka dambeeya. Haddaba anigoo ah dadka aad u akhrist  
Wargeyska waxaan aad uga xumahay dib u dhaca uu Wargey  
ku dib nooga dhaco ama aanu nooba iman muddo badan. Had  
dii uu noo yimaadana wuxu noo yimaadaa, ayadoo wakhtigi  
uu ka hadlaayey la soo dhaafay 6 bilood ama 4 bilood, taasna  
garanmaayo halka ay ku daahaan. Haddii aan tusaale ka so  
qaato waxa aan arkay ama wada socday oo isku maalin noo  
yimi tirsigii 12aad iyo tirsigii 5aad iyo qaar ah 1976kii kuwaan  
oon ka qaatay (10) midh oo kala geddisan iyo qaar kale oo ma  
mar Xamar la iiga keeno, Jaallayaal waxa aan idinka codsa  
nayaa in aad ii oggolaataan in aan ka mid noqdo xubnaha akh  
ristayaasha isla markaasna aad ii soo sheegtaan halka lacagta  
la soo dhigo waayo kuma taallo wargeyska habka lacagta loo  
gu soo diraayo wargeyska.

Waxaan ku talin lahaa in bil walba wargeyska soo bax  
loo soo diro gobollada iyo degmooyinka si ay dadka u wad  
gaadho.

Waxa aan warqaddan ku soo laabaya Heeso dhawr ah oo  
aan anigu sameeyey, wixii aaraa ah ee kalena hadba waan id  
iin soo diri doonaa, iyo haddii aad heeso kale iiga baahataan  
aniga oo aan waxba kaga doonayn wargeyska sababtoo ah wa  
xa aan ahay nin ganacsede ah, kana mid ah Ururka Bacadla  
ha Hargeysa, isla markaana ah xubin X.H.K. Smooaaliyeed ee  
Degmada Hargeysa.

Maxamed Cali (Filsan)

L/H S.B. 234 Hargeysa ama Xarunta Abaad  
bulka Xisbiga H.K. Soomaaliyeed.

# — War — Celin —

Aad ayaanu kuugu mahadinaynaa warqadaadii dhiirige linta ahayd. Waxaannu ka xunnahay inay goor dambe na soo gaadhay. Wixii ishtiraagga iyo daabacadda heesahaaga l xidhiidha waxaanu u gudbinaynaa xoghaynta Guddida Qoraalka ee Wargeyska Halgan. Waxaanu ku ogeysiinaynaa in qaybinta wargeyska dhibaato weyni ka taagnayd, hase yeeshahaatan la qorsheeyey hab wargeyska gobollada iyo degmooyinkaa oo dhan lagu gaadhsiiyo.

## WAXAA LAGU

DAABACAY

MADBACADDA

QARANKA



## Ubadka Maanta, Barbaarta Berri



**Qori Xardhid Soomaaliyeed**